



Federal Republic of Somalia
Office of the President

SHARCI LR. 19

ANSIXINTA SHARCIGA BATROOLKA JF SOOMAALIYA

Taariikh: 08/02/2020

MADAXWEYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurks KMG

MARKUU ARKAY: Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka Lr.GSH241/12/01/B-10/20
taariikh 09/01/2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga Batroolka
Soomaaliya

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Batroolka JF Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 08/02/2020



Madaxweynaha J. F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed "Farmaajo"



Somali Federal Republic
The House of the People
Office of the Speaker

Ref: GSH/241/12/01/B-10/20 الرقم:

التاريخ: Mogadishu- Jan 09, 2020

Ku: Madaxweyanaha Jamhuuriyadda Federaalka soomaaliya
Muqdishu

Og: Guddoomiyaha Aqalka Sare
Muqdishu

Og: Ra'iisul wasaaraha Xukuumadda Federaalka
Muqdishu

Og: Guddiga Kheyraadka Dabiiciga ee Golaha Shacabka
Muqdishu

Og: Garyqaanka Guud ee Dawladda
Muqdishu

Og: Hantidhawrka Qaranka
Muqdishu

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
Muqdishu

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka
Muqdishu

Ujeedo: Sharciga Batroolka J. F. Soomaaliya

Mudane Madaxweyne,

Sida aad la socoto, **Sharciga Batroolka J. F. Soomaaliya** ee halkaan ku lifaaqan waxa soo gudbiyey Xafiiska R/Wasaaraha XFS.

Kadib waxaa ka baaraandagey oo habraacii loogu talagaly marsiiyay Guddiga Kheyraadka Dabiiciga ah ee Golaha Shacabka; iyadoo xildhibaanada Golaha Shacabka ay ka doodeen. Ugu danbayna wuxuu Goluhu ku ansixiyay Sharcigan Kalfadhiga 5-aad

Kulankiisii 16-aad taariikhdu markay ahayd 20/05/2019 iyadoo 150 Xildhibaan xaadir yihiin, codayntuna sidaan ayay u dhacaday:

Oggol: 150;

Diiday: 4;

Ka aamustay: 0;

Aqalka Sare ee Baarlamaanka Fadaraalka Soomaaliya, waxuu Golaha Shacabka u soo gudbiyey Sharcigan oo Ansax ah, oon waxba laga badalin nuqulkii Golaha Shacabku horey ugu direy Aqalka sare. Waxuu Aqalka Sare ugu soo gudbiyey Golaha Shacabka warqadda tirsigeedu yahay XG/380/B-10/20 kuna taariikhaysan 8/01/2020.

Hadaba M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan qodobka 90aad xarafka (f) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka, kaaga codsanayaa inaad go'aanka Golaha ku ogolaato Xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawlada.

Naga Guddooma Salaan Qiimo iyo Qadarin Xanbaarsan

M.ne Maxmaed Mursal-Sheikh Abdirahmaan
Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS




SHARCIGA BATROOLKA JFS

Guddoomiyaha Golaha Shacabka- Baarlamaanka JFS

Tirada Xubnaha Codeysay 154 : Oggol: 150; Diiday: 4; Ka aamustay: 0;

Saxiix: M.ne Maxamed Mursal Sheikh Cabdirahman




Taariikh: Jan 9, 2020



Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS

Saxiix: M.ne Mahad Cabdalla Cawad




Taariikh: Jan 9, 2020



Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS

Saxiixa: Mudane Cabdikarim Xaaji Cabdi Buux



Taariikh: Jan 9, 2020





Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the 1st Deputy Speaker

Ref: 154 /5/1stDS/B-10/19 الرقم:

Mogadishu, May 21, 2019: التاريخ

Ku: Guddoomiyaha Aqalka Sare

Og: Madaxweyanaha Jamahuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumada Federaalka

Og: Guddiga Khayraadka Dabiicga ah iyo Bay'ada

Og: Garyqaanka Guud ee Dawladda

Og: Hantidhawrka Qaranka

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka

Og: Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka

Ujeedo: Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Batroolka

Mudane Guddoomiye, Mudanayaal

Sida aad la socotaan, Hindise Sharciyeedka batroolka ee halkaan ku lifaaqan waxaa soo gudbisay wasaaradda batroolka ee XFS, Kadib waxaa ka baaraandagey oo habraacii loogu talogaly marsiiyay Guddiga Khayraadka Dabiicga ah iyo Bay'ada ee Golaha Shacabka. iyadoo xildhibaanadu ay kaga doodeen akhrinta 2aad. Ugu danbayna wuxuu Goluhu ku ansixiyay Hindise sharciyeedk Kalfadhiga 5-aad fadhigiisa 16-aad taariikhdu markay ahayd 20/5/2019, codayntuna sidaan ayay u dhacaday:

Oggol: 150 ;

Diiday: 0 ;

Ka aamustay: 4;

Sidaas darted, Mudane Guddoomiye waxaa halkaan ku lifaaqan nuqulka Hindise-sharciyeedka uu Golaha Shacabku ansixiyay, iyo dukumentiyoo sharaxaya heerarkii kala duwanaa, wax kabadalladii lagu sameeyay hindise-sharciyeedkaan, si aad oga waajibkiina dastuuriga ah.

Wada shaqayn wacan.

Hon. Abdiweli Ibrahim Sheikh Muudey
K/S Guddoomiyaha Golaha Shacabka ahna
Guddoomiye K/Xigeenka 1-aad ee Golaha Shacabka



House of The People- Villa Hargeisa-Mogadishu-Somalia

Tell: +252-616485802 / +252-612007007

E-mail: abdiweli.muudey@gmail.com

Golaha Aqalka Sare E-mail: info@parliament.gov.so

The Upper House

Website: www.parliament.gov.so

16 JUL 2019

SOO GELID / RECEIVED

Source/ Sign:


HINDISE-SHARCI

Guddoomiye ku-xigeenka

Baarlamaanka JFS

Tirada Xubnaha Codeysay 154: Oggol: 150;


Ka aamustay: 4;



Taariikh: May 21, 2019

Saxiix: M. ne Cabdiwali Ibraahim Sheekh Muhiye


Guddoomiye ku-xigeenka 2aad - Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS



Taariikh: May 21, 2019

Saxiix: M. ne Mahad Cabdalla Cawad

Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS



Taariikh: May 21, 2019

Saxiixa: Mudane Cabdikarim Xaaji Cabdi Buux



Federal Republic of Somalia
House of the People
Natural Resources & Environment Committee

SUMMAD: GKHDB/GSH/B10/004/19

Tr: 22/05/2019

Ku: Guddoonka Golaha Shacabka ee BFS.

= Muqadishu =

Og: Xubnaha Guddiga Kheyraadka Dabiiciga & Bii'dada.

= Muqadishu =

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka ee BFS.

= Muqadishu =

Ujeedo: Warbixinta dib u eegista Sharciga Batroolka iyo Hababkii uu soo maray

HORDHAC

Guddiga Kheyraadka Dabiiciga iyo Bii'ada waxaa sharaf u ah in uu idiin soo gudbiyo warbixin ku saabsan dib u eegista Sharciga Batroolka iyo Habraacyadii uu adeegsaday, iyadoo la tixraacayo Qodobka 79aad, (1) (d) iyo Qodobka 139aad ee Dastuurka KMG ah iyo Qodobka 86aad iyo 50aad (12) ee Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

Sida ay tilmaamayaan Qodobada 99(1)(c) iyo 80(1)(a) ee Dastuurka KMG ee JFS ee ku aaddan diyaarinta hindise-sharciyeedyo iyo soo-hor-dhigiddooda golaha Shacabka, Wasiirka Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta XFS wuxuu golaha shacabka usoo gudbiyay HINDISE-SHARCIYEEDKA BATROOLKA taariikhdu markay ahayd 17ka Sebteembar 2017, islamarkaana uu maray akhrinta 1aad laguna wareejiyay Guddiga Kheyraadka Dabiiciga & Bii'ada sida uu qabo Qodobka 85(1) ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka.

MUHIIMADDA SHARCIGAAN

Sharcigaan muhiimadda uu uleeyahay dadka iyo dalka soomaaliyeed aad beey u balaarantahay waxaana ka mid ah:



- Xaqiijinta xuquuqda Qaranka Soomaaliyeed uu u leeyahay inuu baaro, horumariyo, soo-saaro, ka faa'iidaysto, maareeyana khayraadkiisa Batroolka ee ku jira Badda iyo Berriga;
- Ilaalinta Kheyraadka Batroolka Soomaaliyeed
- Xaqiijinta milkiyadda iyo baaxadda hantida Batrool ee Soomaaliya,
- Nidaaminta howlgallada, baarista iyo horumarinta khayraadka.
- Ilaalinta bii'ada sida Faya qabka Noolaha badda iyo Berriga inta ay socdaan Hawlaha Batroolka;
- Ilaalinta xuquuqda wax soo saarwadaaga ee ay leedahay umadda Soomaaliyeed
- Dhiiri-gelinta maalgashiga,

GO'AAN QAADASHADII GUDDIGA EE DIB U EEGISTA SHARCIGA

Guddiga markuu akhriyay kana baaraandegay Hindise Sharciyeedkii Batroolka ee wasaaraddu soo gudbisay,

Markuu arkay Xeer No.: XGB/712/2008 ee uu ku saxiixnaa Madaxweynihii hore Dowladdii Ku-meel Gaarka aheyd, Mudane Cabdulaahi Yuusuf Axmed, kun qornaa Luuqada Ingiriiska, qodob-qodobna u dul istaagay,

Markuu Xaqiiqsaday in nuqulkii Wasiirka soo gudbiyay in ay isleeyihiin Xeer No.: XGB/712/2008,

Markuu darsay kadib, Guddiga wuu ogaaday in nuqulka wasaaraddu soo gudbisay loo dhigay qaab sharci qabyoqoraal ah,

Markuu tixgeliyay Qodobka 139aad Dastuurka KMG ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya kaa oo xoojinaya in mudnaan la siiyo xeerarkii horay loo ansixiyay. Guddigu wuxuu go'aansaday in uu sharcigii Batroolka ee 2008 dib u eegis ku sameeyo kuna dulshaqeeyo.

SALDHIGA SHARCIGA

Shircigaan waxaa saldhig u ah Dastuurka Ku-meel Gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Heshiiska Lahaanshaha, Maamulka iyo Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ah ee Dalka (shidaalka & Macdanta) ee lagu saxiixay magaalada Baydhabo, 5tii June, 2018.



ISBEDELADA KU DHACAY SHARCIGII 2008 (XEER NO. XGB/712/2008)

Xubnaha Guddiga waxey si qoto-dheer uga doodeen sida ugu saxsan ee Sharciga looga howl bilaabi lahaa, sida uu faraayo Qodobka 50(12) ee Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka, la tashi khubaro Sharci kadib, Guddigu wuxuu dib u eegis ku sameeyay sharcigii Batroolka ee 2008, sida soo socota:

1. Tarjumaad Nuqulka Sharcigii 2008 ee aan helnay oo uu saxiixay Madaxweyne Cabdulaahi Yuusuf Axmed wuxuu ku qoranyahay Af Ingiriis (eeg lifaaqa 3aad), waxaana utarjunnay af Soomaali (eeg lifaaqa 2aad).
2. Dib-u-eegis qodobo: waxaan bedelnay, xag erey iyo xag nuxurba 21 qodob, oo kala ah:
Qodobbada 1aad, 2aad, 3aad, 4aad, 5aad, 6aad, 7aad, 8aad, 9aad, 10aad, 11aad, 12aad, 13aad, 19aad, 20aad, 24aad, 35aad, 37aad, 48aad, 59aad, 60aad.
3. Kala Hormarin Qodobi:
B. Qodobka 12aad: oo loo raray Qodobka 1aad.
T. Qodobka 13aad: oo loo raray Qodobka 3aad.
4. Wax-ku-kordhin qodobbo: waxaan qodobbada soo socda ku soo kordhinay faqrado iyo/ama xarfo;
B. Qodobka 20aad: oo lagu soo kordhiyay faqrad 9aad.
T. Qodobka 24aad: oo lagu soo kordhiyay faqrad 9aad.
X. Qodobka 28aad: oo lagu soo kordhiyay faqraddiisa 1aad xarafka(sh) iyo faqrad 3aad oo cusub.
Kh. Qodobka 30aad: oo lagu soo kordhiyay faqrad 5aad.
D. Qodobka 37aad: oo lagu soo kordhiyay faqrad 3aad.

WAJIYADII UU SOO MARAY SHARCIGA

Iyadoo la raacyo habraacyada dib u-eegista Sharciyada ee ku cad Dastuurka Ku-meel Gaarka ah ee JFS, iyo Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka, sharcigaan wxuu Soomaray wajiyo kala duwan.

AKHRINTII 2AAD,

Waxaa akhrintii 2aad laga hor akhriyay Golaha Shacabka 18kii May, 2019, Sida uu qabo, Qodobka 84aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka ee ah “*Hindise Sharciyeed walba waa in laga hor-akhriyaa Golaha Shacabka sadex jeer oo kala duwan, sadax maalmood oo kala duwan, ka hor intuu ansax noqon*”.

Howl wadeenada Baarlamaanka iyo Xubnaha guddiga waxaay qoraal iyo Muuqaalba u keydsadeen doodii Xildhibaanada.

Guddigu wuxuu isa soo hordhigay doodii Xildhibaanada Muuqaal iyo Qoraalba, ayadoo la dul istaagayay isla markaana ka dooday Xildhibaan walba Soojeedintiisii, Aragtidiisii ama dhaliishiisii. Ka dibna ku biirinay sharciga aragtiyadii xildhibaanada oo intooda badan muhiim u ahaa Sharciga.

FAAFREEBID

Maadaamaa dib u-eegista Sharcigaan laga soo turjimagay af-ingiriis, waajibna tahay in la faafreebo lana hubiyo weedh-sharciyeedkiisa, waxaan soo marsiinay **Akadeemiyada Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta Soomaaliyeed**, si ay u hubiso Eray bixinta sharciga.

DHAGEYSI DADWEYNE

Muhiimadda uu leeyahay Batroolka iyo inuu yahay qeyb nagu cusub kasoo kow, waxaa waajib ah in dadweynaha macluumaad waafi ah laga siiyo sharciyada iyo howlaha socdo ee uu wado Baarlamaanka, si ay u helaan fursad aragtiyadooda ugu dhiibtaan kuna biiriyaan sharciga waxa ay u arkaan muhiim ineey tahay in lagu daro. Hadaba Guddiga isagoo ka duulaya Mabaadiidaas wuxuu qabtay dhageysi dadweyne. Taariikhdu markeey aheyd 17 May, 2019, Dadweyne isugu jiray Bulshada qeybaheeda kala duwan ayaa kaga soo qeyb galay dooda iyo dhageysiga dadweynaha Hotel Jazeera, Muqdisho.

Dood iyo tala kubirinta sharciga ka dib dadweynaha waxay aad usoo dhaweeyeen dib u-eegista sharcigaan, waxaayna dalbadeen in la dar dar geliyo si loo soosaaro kheyraadka Batrool. (Muuqaaladii dooda ka qaata Keydka Golaha)

AKHRINTII 3AAD,


Akhrintii seddexaad waxaa Golaha laga hor akhriyay 20 May, 2019. Akhrinta guddiga ka dib Xildhibaanadu waxaay aad usoo dhaweeyeen qaabkii looga soo shaqeyay sharcigaan muddada dheer qaatay, halkaasna ay ku ansixyeen cod aqlabiyad ah.

XUBNAHA GUDDIGA KHEYRAADKA DABIICIGA IYO BII'ADA

No.	Magaca	Jagada
1.	Xil. Yuusuf Xuseen Axmed Gamadiid	Guddoomiye
2.	Xil. Cabdifataax Maxamed Cali	G/ku Xigeen
3.	Xil. Jawaahir Cabdi Cadaawe	Xoghayn


4.	Xil. Cabdulaahi Abuukar Xaaji	Xubin
5.	Xil. Maxamed Cabdulaahi Faarax (Geelle)	Xubin
6.	Xil. Zakariye Xasan Sh. Cali Gaashaan	Xubin
7.	Xil. Abdiqaadir Aadan Nuur	Xubin
8.	Xil. Maxamed Axmed Abtidoon	Xubin
9.	Xil. Daa'uud Maxamed Cumar	Xubin
10.	Xil. Aamina Xasan Cali	Xubin
11.	Xil. Muuse Axmed Cismaaciil	Xubin
12.	Xil. Lutfi Sariif Maxamed Cumar	Xubin
13.	Xil. Nuur lidow Beyle	Xubin
14.	Xil. Cabdirasaaq Daahir Maxamuud	Xubin
15.	Xil. Dr. Cabdi Cali Xasan	Xubin
16.	Xil. Cabdulaahi Sheekh Maxamed Bakistaan	Xubin

Salaan iyo wada-shaqayn wacan,




Xil. Yuusuf Xuseen Axmed Gama'diid
 Guddoomiyaha Guddiga Kheyraadka Dabiiciga iyo Bii'ada
 Golaha Shacabka, Baarlamaanka Ferderaalka Soomaaliya.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Aqalka Sare
Xafiiska Guddoomiye KX 1aad



جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ
مكتب النائب الأول

Ref: 54/ _____ الرقم:

Federal Republic Of Somalia
The Upper House
Office Of The 1st Deputy Speaker

Taariikh-Date: 12/12/2019 التاريخ:

Ku:- Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS
Og:- Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda
Og:- Guddiga Maaliyadda ee Aqalka Sare
Og:- Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Og:- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=

Ujeedo:

Soo Gudbin Qaraar Gole (Ansixinta Sharciga Canshuuraha Furdooyinka)


Mudane Guddoomiye,

Salaan diirran ka dib, waxaan kuu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee tirsigiisu yahay Tix: GAS/B-10/KF6/08/2019 kuna taariikheysan 04 Dec. 2019 kuna ansixiyay Goluhu Sharciga Sharciga Canshuuraha Furdooyinka:

- Waxaa codeeyay: 32 Senatar.
- Waxaa oggolaaday: 32 Senatar.
- Waxaa diiday: 0 Senatar.
- Waxaa ka aamusay: 0 Senatar.


Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee kor ku xusan iyo nuqulka sharciga uu Goluhu soo ansixiyay si aad u gudataan waajibka dastuuriga ee la idin igmaday.

Iga guddoon qadarin.


Sen. Abshir Maxamed Axmed

Ku-Xigeenka 1aad Ahna Ku-Simaha Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya







ANSIXINTA SHARCIGA CANSHUURAHA FURDOOYINKA

Senatarrada Codeeyay	Oggolaaday	Diiday	Ka Aamusay
32	32	0	0


Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya


Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi



Taariikh: 04^{ta} Disembar 2019


Guddoomiye Ku Xigeenka Kowaad ee Golaha Aqalka Sare Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya


Sen. Abshir Maxamed Ahmed




Taariikh: 04^{ta} Disembar 2019

Guddoomiye Ku Xigeenka Labaad ee Golaha Aqalka Sare Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya


Sen. Mowliid Xuseen Gu



Taariikh: 04^{ta} Disembar 2019



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka**

**Sharciga Batroolka Jamhuuriyadda Federaalka
Soomaaliya**

5/16/2019

TUSMO

HORDHAC	1
CUTUBKA 1AAD – TALAAABOYINKA AASAASIGA AH EE SHARCIGA BATROOLKA	1
Qodobka 1aad: Aasaaska Sharciga Batroolka.....	1
Qodobka 2aad: Erey Bixin.....	1
Qodobka 3aad: Ujeeddo.....	5
Qodobka 4aad: Lahaanshaha Batroolka.....	6
Qodobka 5aad: Milkiyadda Kheyraadka Dabiiciga ah.....	6
Qodobka 6aad: Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Batroolka.....	6
Qodobka 7aad: Maamulka Kheyraadka Batroolka.....	6
Qodobka 8aad: Qorsheynta Qeybinta Saamiyada Dakhliga Batroolka ee Degaannada aan Batroolka Soo Saarin ...	7
Qodobka 9aad: Shirkadaha Batroolka Horey uga Haystey Heshiis Dawladda Soomaaliya.....	7
Qodobka 10aad: Hababka Xaqiijinta iyo Ilaalinta Batroolka Ka dib Soo Saaristiisa.....	7
Qodobka 11aad: Ilaalinta Bii’ada.....	8
Qodobka 12aad: Magdhow Khasaare La Geystay.....	8
Qodobka 13aad: Awoodda Bixinta ogolaanshaha Shidaalka.....	8
CUTUBKA 2AAD – QAYBAHA GUUD	9
Qodobka 14aad: Baxaadda Dhul ee Sharcigan.....	9
Qodobka 15aad: Baaxadda Maaddo ee Sharcigan.....	9
Qodobka 16aad: Xuquuqda Hanashada Batroolka.....	9
Qodobka 17aad: Ku Dhaqanka Awoodaha, Shaqooyinka Wasaaradda iyo Ha’yadda Batroolka.....	9
Qodobka 18aad: Hawlaha Wasaaradda.....	10
Qodobka 19aad: Aasaasida iyo Hawlaha Ha’yada Batroolka Soomaaliyeed (HBS).....	11
Qodobka 20aad: Dhismaha Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed (SHBQS).....	20
Qodobka 21aad: Xadidaada Xuquuqda Saraakiisha Dawladda.....	23
Qodobka 22aad: Naqshadeyn.....	23
CUTUBKA 3AAD –RUQSADAHAWLGALLADA BATROOLKA	24
Qodobka 23aad: Ruqsada Sahanka Indha-Indheynta.....	24
Qodobka 25aad: Ruqsadaha ka Hawlgalka Dhulka Dushiisa.....	26
Qodobka 26aad: Bandhig Codsii.....	27
Qodobka 27aad: Guud ahaan Hawlgallada Batroolka.....	29
Qodobka 28aad: Ilaalinta degaanka (Bii’ada).....	29
Qodobka 29aad: Soo Celin iyo Magdhaw.....	30
Qodobka 30aad: Xaddidaada Adeegsiga Xuquuqda.....	31
Qodobka 31aad: Ansixinada Hayada Batroolka Soomaliyeed.....	32
Qodobka 32aad: Heshiiska Mideynta.....	33
Qodobka 33aad: Xallinta Khilaafaaka.....	34
Qodobka 34aad: Ka-dhaafid ama Wax ka-beddelid Shuruudo.....	34
CUTUBKA 4AAD – KA QAYBGALINTA SOOMAALIYA	35
Qodobka 35aad: Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed iyo ka Qayb Galinta Dawlad Goboleedyada.....	35
CUTUBKA 5AAD – FULINTA HAWLGALLADA BATROOLKA	35
Qodobka 36aad: Hab-Dhaqannada Shaqo.....	35
Qodobka 37aad: Dib u furfuridda Agabka Shaqo ee Batroolka (Decommissioning).....	36
CUTUBKA 6AAD – MACLUUMAAD IYO DABAGAL	38
Qodobka 38aad: Xog iyo Macluumaad.....	38
Qodobka 39aad: Hanti dhawr iyo Kormeer.....	38
Qodobka 40aad: Dhammaadka Ruqsadda.....	38
Qodobka 41aad: Hufnaanta Dawladda Dhexe, Wasaaradda iyo HBS.....	39
CUTUBKA 7AAD – MACLUUMAAD SHAACSAN	40
Qodobka 42aad: Faafinta Hay’adda Batroolka Soomaliya (HBS).....	40
Qodobka 43aad: Xog Shaacsan.....	40
Qodobka 44aad: Daah Furnaan.....	42
CUTUBKA 8AAD – XEER-NIDAAMIYE IYO TILMAAMO	43

Qodobka 45aad: Xeer-Nidaamiye.....	43
Qodobka 46aad: Tilmaamo.....	44
CUTUBKA 9AAD – QODOBBADA CIQAABTA.....	45
Qodobka 47aad: Baaxadda Xududeed iyo Maaddo ee Cutubkan	45
Qodobka 48aad: Dembiyada iyo Ciqaabaha.....	45
Qodobka 49aad: Mas`uuliyadda dadka, Shirkadaha iyo Hay`adaha Kale Qaanuuniga ah.....	45
Qodobka 50aad: Ganaaxyada Shaqsiyaadka, Shirkadaha iyo Hay`adaha kale ee Qaanuuniga.	46
Qodobka 51aad: Kormeeridda.....	46
Qodobka 52aad: Warqad Fulin Xukun oo ka Baxsan Hannaanka Garsoorka.....	46
Qodobka 53aad: Sharciyada Is Kaabaya	46
CUTUBKA 10AAD – QODOBBADA GUNAANADKA AH IYO KUWA KU-MEEL-GAARKA AH.....	47
Qodobka 54aad: Qodobka Kala guurka ah	47
Qodobka 55aad: Dhaqangalka Sharcigaan	48

HORDHAC

Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, isaga oo tixgelinaya horumarinta dhaqaalaha iyo dhiirigelinta maalgashiga kheyraadka dalka wuxuu soo saarayaa Sharciga Batroolka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

CUTUBKA 1AAD – TALAAABOYINKA AASAASIGA AH EE SHARCIGA BATROOLKA

Qodobka 1aad: Aasaaska Sharciga Batroolka

Iyada oo la tixraacayo Qodobada 7(1), 44, 63(b), 69[(1)(a)] iyo 79[(1)(d)] ee Dastuurka KMG, Barlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu soo saarayaa sharcigan oo laga hirgelin doono Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, dhammaan dhulkeeda, badda iyo berrigaba.

Qodobka 2aad: Erey Bixin

Marka sharcigan laga hadlayo, ereyada soo socda waxay leeyihiin macnaha mid walba ku hor qoran:

1. **Ogolaansho:** waxaa loola jeedaa Ruqsad baaris, Heshiis Wax Soosaar Wadaag ah, oggolaansho isticmaalka dhulka korkiisa, ama heshiis kasta oo ay gasho Dawladda oo la xiriira oggolaanshahaas.
2. **Aagga la Oggolaaday:** waxaa loola jeedaa dhulka ama goobta oggolaanshaha xilli ka xilli lagu baxsho.
3. **Shakhsiga Ogolaanshaha la siiyay:** waxaa loola jeedaa:
 - b) Qandaraaslaha Heshiiska Wax- Soo saar Wadaagga; iyo
 - t) Shakhsiga Ogolaanshaha la siiyey, noocay rabto ha noqotee;
4. **Muddo Sannadeed:** waxaa loola jeedaa laba iyo toban bilood oo ka bilaabata 1da Janaayo kuna dhammaata 31da Diseembar, ee tirsiga sannadka Miilaadiga ah.
5. **Aagga Heshiiska:** waxaa loola jeedaa goobta Ogolaanshaha Heshiis Wax-Soo saar Wadaagga lagu bixiyey;
6. **Qandraasle:** waxaa loola jeedaa shakhsiga Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta la gashay heshiis wax-Soo-saar Wadaag;

7. **Kontroll:** waxaa loola jeedaa markii ay shakhsi ku saabsan tahay, awoodda uu uleeyahay shakhsi kale inuu ku hanto awood suurta galinaysa in shakhsiga koowaad lagu maamulo qaab waafaqsan rabitaanka ama tilmaamaha shakhsigaas kale, taasoo ku salaysan:
 - b) lahaanshaha saami ama awood codeed, oo la xirirta shakhsiga hore ama shakhsi kastoo kale; ama
 - t) awood kasta oo ay bixinayaan shuruucda unkidda, ama xeerarka kale ee nidaamiya shakhsiga hore ama shakhsi kasta oo kale;
8. **Saliid Ceyriin:** waxaa loola jeedaa macdan saliid ah oo aan la sifeyn iyo dhammaan hydrocarbon-ada dareera ama laga miiray gaaska dabiiciga.
9. **Dib u Furfurid:** waxaa loola jeedaa marka laga hadlayo aagga heshiiska ama qayb ka mid ah, hadba xaaladdu siday tahay, ka tagista, furfuridda, wareejinta, bixinta ama/iyo duduminta dhismooyinka, kaabayaasha, iyo walxaha rakiban, qalabka ama hantida kale, iyo shaqooyinka kale ee loo adeegsado hawlaha Batroolka ee aagga heshiiska, si looga nadiifiyo aaggaas, loogana dhigo mid wanaagsan oo aan khatar lahayn, loona dhawro bii'ada;
10. **Habdhaqan-wanaagga Goobta Saliidda:** Waxay leedahy macnaha lagu sheegay Qodobka 36.1;
11. **Xukuumad:** waxaa loola jeedaa hay'adda fulinta ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, oo ay wakiilo ka yihiin masuuliyiinta ama Wasaaradda shaqada ku leh, sida uu go'aamiyo Golaha Wasiirada.
12. **Kormeere:** wuxuu leeyahay macnaha lagu sheegay Qodobka 39.1
13. **Sharci:** waxaa loola jeedaa Sharciga Batroolka, iyo sida dib u eegis ama wax ka beddel loogu sameeyo waqti ka waqti.
14. **Wasaarad:** waxaa loola jeedaa Wasaaradda hadba mas`uul Dawladda uga ah dhaqan-gelinta Sharcigan, sida ay u dejisay Dawladdu, oo hadda ah Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta.
15. **Wasiir:** waxaa loola jeedaa wasiirka hadba xukuumadda mas`uul uga ah dhaqan-gelinta Sharcigan, sida ay u go'aamiso Dawladda, kaas oo hadda ah wasiirka Batroolka iyo Macdanta.

16. **Gaaska Dabiiciga ah:** waxaa loola jeedaa dhammaan hydrocarbon-ada gaaska ah iyo kuwa aan falgelin, oo ay ka mid yihiin gaaska qoyan, gaaska qalalan, gaaska ka koreeya saliidda iyo midka ka hara, kadib marka hydrocarbon-ka dareera laga saaro gaaska qoyan, oo aan ahayn saliidda ceyriin.
17. **Hawl Fuliye:** waxaa loola jeedaa shakhsi idman ama shakhsi kale oo ogolaansho Heshiis Midayn ku magacaaban, oo u xilsaaran iskudubaridka iyo kormeerka Hawlaha Batroolka;
18. **Baarlamaan:** waxaa loola jeedaa Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.
19. **Shakhsi:** waxaa soo galaya shirkad ama hay'ad qaanuuni ah.
20. **Batrool:** waxaa loola jeedaa:
 - hydrocarbon kasta oo iskiis u samaysmay, ha lahaado qaab gaas, dareere ama adke; ama
 - t. iskujir kasta oo hydrocarbon ah oo iskiis u samaysmay, ha lahaado qaab gaas, dareere, ama adke.
21. **Hawlaha Batroolka:** waxaa loola jeedaa hawlo looga danleeyahay in:
 - b. Lagu sahamiyo Batroolka;
 - t. Lagu baaro, hormariyo, soo saaro, iibiyo ama lagu dhoofiyo Batroolka; iyo
 - j. Lagu dhiso, lagu taago, ama lagu hawlgaliyo dhismooyin, kaabayaal iyo xarumo loo adeegsanayo horumarinta, wax-soosaarka iyo dhoofinta Batroolka, ama dib u habaynta ama kala furfurista dhismo kasta oo ka mid ah kaabayaashaas ama xarumahaas.
22. **Heshiis Wax Soo-saar Wadaag:** waxaa loola jeedaa heshiis lagu galay ama lagu bixiyay si waafaqsan qodobka 3aad, kaas oo uu qandaraasluhu ku helayo saami ka mid ah shidaalka lagu soo saaro hawlaha Batroolka, saamigaas oo loo gu badalayo hawlihii uu qabtay.
23. **Sarkaal Dawladeed:** waxaa loola jeedaa shaqaalaha madaniga ah ee Dawladda ama shakhsi u dhigma, xubnaha Baarlamaanka, Xukuumadda, Garsoorka ama Garyaqaanada guud, ama shakhsi ka tirsan Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed.
24. **Ogolaansho baaritaan:** waxaa loola jeedaa ogolaansho lagu bixiyay si waafaqsan Qodobka 23aad.

25. **Xeerarka:** waxaa loola jeedaa xeer-nidaamiyeyaal iyo xeer hoosaadyo ay Wasaaraddu waqti ka waqti soo saarto oo la xariira maamulka Hawlaha Batroolka, sida ku cad sharcigan.
26. **Haro Batrool:** waxaa loola jeedaa waro ama ilo ku samaysmay dhulka hoostiisa oo ay ku jiraan kayd ama kaydada kala qaybsan oo badan ee hydarokarboon dabiici ah oo ku qafilan (Saliid iyo/ama gaas) dhagax aan la mari karin iyo/ama haraynayaan biyo xireenno kuwaas oo isaga mid ah cadaadis dabiici ah oo wada kulmiya.
27. **Qandrasle Dawlad Goboleed:** waxaa loola jeedaa shakhsi ku dhex shaqaynaya sharciyada Soomaaliyeed, oo ay leedahay kontoroolkeeda, si toos ah ama dadban, dawlad ka mid ah dawlad goboleedyada Soomaaliyeed.
28. **Hay'adda Batroolka Soomaaliyed (HBS):** waxaa loola jeedaa hay'ad awood leh oo sharcieysan, iyada oo la tixraacayo Qodobka 19aad.
29. **Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed (SHBQS):** waxaa loola jeedaa shirkad awood leh oo sharcieysan, iyada oo la tixraacayo Qodobka 20aad.
30. **Ogolaansho Isticmaal Dhulka Korkiisa:** waxaa loola jeedaa oggolaansho isticmaal dhuleed sida ku cad Qodobka 25aad.
31. **Dhulka Soomaliyeed:** wuxuu ka kooban yahay dhulka, biyaha iyo hawada oo hoos yimaada madax-bannaanida Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana ku jira xuduudaha badda iyo berriga iyo aagagga dhaqaale iyo Dhulbadeedka u cabiran Dalka Soomaaliya, oo horey loogu gudbiyey Qaramada Midoobay sida ku cad sharciyada la isku raacsan yahay ee caalamiga ah oo Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya xaq u siinaya baarista, horumarinta iyo soo saarista kheyraadkeeda dabiiciga ah.
32. **Soomaaliya:** waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
33. **Ceel:** waxaa loola jeedaa qodid ama daloolin dhulka iyo badda gunteeda, looguna tala galay soo-saaris batrool.
34. **Heshiiska Lahaansha, Maamulka iyo Wadaagga Dhakhliga Khayraadka Dabiiciga ee Dalka (shidaalka iyo macdanta):** Waxaa loola jeedaa heshiiskii Lahaanshaha, Maamulka iyo Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ee Dalka (Shidaalka iyo macdanta) ee lagu saxiixay Baydhaba 5tii Juun 2018.

35. Madaxda fulinta:

b. **Heer federal:** waxaa loola jeedaa Ra'iisul Wasaaraha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

t. **Heer dawlad goboleed:** waxaa loola jeeda madaxweynayaasha dawlad goboleedyada iyo Gudoomiyaha Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad: Ujeeddo

Ujeeddooyinka sharcigan waa:

1. In uu xaqiijiyo xuquuqda madax bannaanida qaranka Soomaaliyeed uu u leeyahay inuu baaro, horumariyo, soo-saaro, ka faa'iidaysto, maareeyana kheyraadkiisa Batroolka ee ku jira badda iyo berriga.
2. In uu oggolaado dadaallada lagu xaqiijinayo baaxadda hantida Batroolka ee ku jira Soomaaliya, iyada oo loo samaynayo qaab nidaameed, heshiisyo iyo qaab xisaabeed oggolaanaya sahmin, baaris, horumarin, wax soo-saar iyo suuqgayn batrool kasta oo la helo.
3. Haddii kheyraad batrool laga helo Soomaaliya, waa inuu dalka Soomaaliya iyo dadkiisuba ka helaan manfaca ugu badan oo ka imaanaya horumarinta iyo wax soo-saarka Batroolka.
4. In uu hubiyo ilaalinta, kaydinta iyo daryeelka bii'ada inta ay socdaan hawlaha Batroolka.
5. In la dhiirrigeliyo lana taageero maalgelinta shisheeye ee dalka soo galaysa, si loo gaaro himmilooyinka kale ee sharcigan.
6. In la dhiso Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed oo noqonaysa hay'adda u xilsaaran nidaaminta hawlaha Batroolka, iyada oo dhaqan gelinaysa mabaadi'ida sinnaanta, furfurnaanta, isla xisaabtanka, hufnaanta iyo kala soocid la'aanta.
7. In la dhiso Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed oo ah hay'ad kontoroolkeedu Dawladdu yeelanayso oo ka qaybqaadanaysa hawlgallada Batroolka ee ka socda gudaha Soomaaliya.

8. In loo hoggaansamo talaabooyinka dawliga ah si loo xaqiijiyo hufnaanta ku saabsan wax soo-saarka Batroolka, iyada oo la xoojinayo mamulka maaliyadeed ee guud iyo isla xisaabtanka, lana qirayo in maamulidda kheyraadka dabiiciga ah ay u dhacayso si faa'iido ugu jirto muwaadinka Soomaaliyeed, xilkeeduna saaran yahay dawladda, iyada oo u maamulaysa si waafaqsan horumarinta danaha qaranka.
9. In si siman loo sugo xaqsoorka ay yeelan karaan shakhsiyaadkii qaanuuniga ahaa ee horay u haystay xuquuq baaritaan batrool oo ay ka dhaxleen xukuumaddii Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya, intii ka horaysay Disember 30, 1990.

Qodobka 4aad: Lahaanshaha Batroolka

Kheyraadka Batroolka waa hanti qaran oo ay wada leeyihiin dhammaan shacabka Soomaaliyeed, oo ay wakiil uga yihiin Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka.

Qodobka 5aad: Milkiyadda Kheyraadka Dabiiciga ah

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa milkiilaha kheyraadkeeda dabiiciga ah berriga iyo baddaba.

Qodobka 6aad: Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Batroolka

Dakhliga Batroolka ka soo xarooda waa wadaag, waxayna Dawladda Federaalka iyo Dawlad-Goboleedyada xubnaha ka ah u wadaagayaan si waafaqsan Heshiiska Lahaanshaha, Maamulka iyo Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ah ee Dalka (shidaalka & Macdanta) oo ku qotoma Qodobka 44 ee Dastuurka KMG.

Qodobka 7aad: Maamulka Kheyraadka Batroolka

1. Maamulka kheyraadka Batroolka waxaa si wadajir ah u maamulaya Dawladda Federaalka, Dawladaha Xubnaha ka ah, kuwa ka mid noqon doona iyo gobolka Banadir, si waafaqsan Qodobka 2aad ee Heshiiska

Lahaansha, Maamulka iyo Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Dalka (shidaalka iyo macdanta).

2. Golaha kheyraadka dalka waa golaha ugu sareeya ee lagu lafa guro arrimaha kheyraadka ee u baahan in laga heshiiyo, loolana noqdo wixii lagu xallin waayo golayaasha maamul ee kale, wuxuuna ka kooban yahay madaxda fulinta ee heer federaal iyo heer dawlad goboleed.

Qodobka 8aad: Qorsheynta Qeybinta Saamiyada Dakhliga Batroolka ee Degaannada aan Batroolka Soo Saarin

Dawladda Federaalka waxay xaqiijinaysa helidda gobollada aan soo saarin Batroolka saamiga ay ku leeyihiin dakhliga Batroolka si waafaqsan Heshiiska Lahaanshaha, Maamulka iyo Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Dalka (Shidaalka iyo Macdanta).

Qodobka 9aad: Shirkadaha Batroolka Horey uga Haystey Heshiis Dawladda Soomaaliya

1. Dhammaan heshiisyada la xiriira Batroolka ee lala saxiixday maamullo ka jira qaybo ka mid ah Soomaaliya, ama dawladihii kumeel-gaarka ahaa mudada u dhexeysa Disember 1990 ilaa Setember 2012, waa waxba kama jiraan.
2. Dhammaan heshiisyadii ay wada saxiixdeen shirkadaha ajnebiga iyo Dawladda Soomaaliya wixii ka horeeye 1991 waxaa loo tixgelinayaa inay yihiin heshiisyo jira.
3. Shirkadahaas heysta heshiisyadii ka horeeyay 1991 Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay u cusbooneysiin doontaa si waafaqsan Qodobka 54aad.

Qodobka 10aad: Hababka Xaqiijinta iyo Ilaalinta Batroolka Ka dib Soo Saaristiisa

Dawladda Federaalka Soomaaliya iyadoo la kaashanaysa dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka waxay mas'uul ka tahay ilaalinta iyo xaqiijinta ammaanka shirkadaha iyo hawlgallada Batroolka ee gobolada iyo degmooyinka kala duwan ee dalka.

Qodobka 11aad: Ilaalinta Bii'ada.

Shirkadaha ogolaanshaha Batroolka la siiyay waa in ay ilaaliyaan bii'ada deegannada ay saamaynta ku yeelan karaan hawlgalladda, si waafaqsan xeerarka dalka, xeerarka iyo heshiisyada caalamiga ah ee ilaalinta Bii'ada. Shirkadahaasi waa in ay dhawraan badqabka:

b) Bani'adamka

t) Xoolaha la dhaqdo iyo duurjoogta .

j) Beeraha iyo daaqa

x) Badda Kh)

Webiyada

d) Haraha

r) Hawada,

s) Dhulka/ciidda

sh) IWM.

Dawladda Federaalka Soomaaliya waa inay ku ilaaliso shirkadahaas gudashada waajibaadka ka saaran dhawrista badqabka bii'ada si waafaqsan shuruucda bii'ada ee dalka, kuwa caalamiga ah, qodobada sharcigan iyo xeer nidaamiyeyaashiisa.

Qodobka 12aad: Magdhow Khasaare La Geystay

Hawlgal kastoo sahmin iyo qodis ah oo waxyeello u geysta bani'aadamka iyo hantida gaarka ah, waxaa waajib ah in ay shirkadaha Batroolku ka bixiyaan magdhaw u dhigma khasaaraha ka dhashay.

Qodobka 13aad: Awoodda Bixinta ogolaanshaha Shidaalka

Shirkadaha caalamiga, shirkadaha qaran, shirkadaha wadaniga ah iyo shirkadaha isu tegay ee sameynaya sahan ama qodis batrool, waxay heshiis la geli karaan Dawladda Federaalka oo kaliya si ay hawlaha Batroolka uga fuliyaan Soomaaliya si waafaqsan Qodobada 19.14 iyo 24.1, iyo Heshiiska Lahaanshaha, Maamulka iyo Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ah ee Dalka (shidaalka & Macdanta).

CUTUBKA 2AAD – QAYBAHA GUUD

Qodobka 14aad: Baxaadda Dhul ee Sharcigan

Sharcigan wuxuu ka dhaqan gelayaa dalka Soomaaliya.

Qodoba 15aad: Baaxadda Maaddo ee Sharcigan

1. **Baaxadda:** Sharcigan waxaa lagu dhaqayaa hawgallada Batroolka.
2. **Macdan kale:** Jiritaanka ogolaansho lagu bixiyey aag cayiman ma reebeyso in la bixiyo ogolaansho baaritaan iyo soo saaris walxo macdaneed oo ka duwan batrool, haddii mudnaanta ay lahaanayaan hawlgallada Batroolka oo aanay hawlaha kale carqalad ku ahayn habsami u socodka halwgallada Batroolka.

Qodobka 16aad: Xuquuqda Hanashada Batroolka

1. **Xuquuqda Batroolka.** Xuquuqda iyo hanashada Batroolka ku jira dalka Soomaaliya waa hanti qaran oo ay dadweynuhu ku aamineen Dawladda Federaalka iyo Dawladaha xubnaha ka ah, iyaguna gacanta ku hayaan.
2. **Wareejin lahaansho dib u hanasho ka dib.** Shakhsi wuxuu yeelan karaa lahaansho batrool, keliya ka dib markii si sharci ah loo siiyo ogolaansho Heshiis Wax-Soo-saar Wadaag sida ku cad Sharcigan.

Qodobka 17aad: Ku Dhaqanka Awoodaha, Shaqooyinka Wasaaradda iyo Ha'yadda Batroolka

1. Isticmaalka Awoodaha iyo xilalka Shaqo waxaa iska leh Wasaaradda iyo Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS) oo ugu dhaqmayaa si waafaqsan sharcigan iyo xeer nidaamiyeyaashiisa, ayna ka mid yihiin ogolaansha lagu bixiyey sharcigan, sida:
 - b. Xaqiijinta habsami u maaraynta kheyraadka;
 - t. Xaqiijinta horumarinta Batroolka iyada oo la ilaalinayo bii'ada, si loo sugo kobcinta dhaqaalaha, iyo barnaamijyada horumarinta fog ee
 - j. Loo fulinayo si macquulna ah; lana jaanqaadi karta Habdhaqan-Wanaagga Goobta Saliidda;

2. **Fursad soo Bandhig Cabashooyin.** Inta aanay isticmaalin awoodda shaqo, Wasaaradda iyo hay'addu waa inay siiyaan fursad shakhsiyadka ay dhici karto in arrintu saamaysay in ay soo gudbiyaan cabashooyinkooda, kuwaas oo tixgelintooda mudan marka la soo gudbiyo hadday u muuqdaan kuwo maangal ah;

Qodobka 18aad: Hawlaha Wasaaradda

1. Hawlaha Wasaaradda.

Wasaaraddu waxay gudanaysaa shaqooyinka soo socda;

- b. Waxay go'aan ka gaaraysaa istiraatiijiyada, qorshaha iyo siyaasadda horumarinta hawlaha Batroolka.
- t. Waxay soo saaraysaa xeerar ku saabsan maareynta hawlaha Batroolka, iyada oo tixgelinaysa soo jeedinta HBS, sida ku cad Sharcigan.
- j. Waxay go'aan ka gaaraysaa siyaasadda iyo iskaashiga lala yeelanayo shirkadaha shisheeye, ayna ku jirto qaabka ogolaanshaha oo ay soo diyaarisay HBS.
- x. Waxay maareynaysaa hannaanka loogu bedelayo Heshiis Wax-Soosaar wadaagga, xuquuqihii ogolaanshiyaha la xariiray oo ay horey u bixisay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, ka hor Disember 30, 1990, sida lagu xusay Qodobka 54.1.
- kh. Waxay dejinaysaa siyaasadda lagu dhiirigelinayo ama lagu xakamaynayo dhoofinta Batroolka si loo ilaaliyo danaha Soomaaliyeed.
- d. Inay la socoto dhaqdhaqaaqa Hawlaha Batroolka ee gudaha Soomaaliya iyo gobolada saaran xuduudaha Soomaaliya.
- r. Inay la xaajooto, iyada oo kaashanaysa hay'adaha dalka ee ay khusayso, wasaaradaha, waaxyaha iyo hay'adaha u xilsaaran mas'uulkana ka ah xeerarka wadamada deriska ah ee la xariira hawlgallada Batroolka, taas oo saamayn ku yeelan karta isu gudubka xuduudeed oo ay ka mid tahay haraha iyo dhuumaha isu gudba oo ay wadaagi karaan dalalka deriska ah.
- d. Dawladdu waxay u xilsaari kartaa Wasaaradda shaqo dheeri ah oo la xiriirta nidaaminta iyo la socodka hawlaha Batroolka iyo haddiiba ay haboonaato, u kuur galidda arrimaha ku saabsan shaqada ay wasaaraddu qabanayso hadba waqtiga la joogo.

2. Sir Xajinta Wasaaradda. Marka shaqaalaha Wasaaradda heer qaran iyo heer dawlad goboleed ay gudanayaan hawlahooda sharcieysan, waxaa waajib ku ah inay dhawraan xog ogaalnimada siraha ganacsi ee shakhsiyadka iyo shirkadaha oo ay ogaadeen, wasaaradduna ku qanacday in:

b. Bixinta xogtu u keeni karto khasaaro ama faa'iido si toos ah u taabanaysa shakhsiga ugana imaanaysa xilgudashada Wasaaradda, ama dhalin karta inay wax u dhinto shakhsiyaadka la filayo inay tartamaan, ama

t. Xogtu tahay mid maaliyadeed, ganacsi, cilmi ama farsamo oo ka mid ah sirta loo gudbiyey Wasaaradda oo mar walba loo arkaayey mid xajin ka mudan shakhsiga ay sida tooska ah u saamaynayaan hawlaha Wasaaradda, oo iyaduna u aragto in danta shakhsiga ee ku jirta ilaalinta xogtan ay ka muhiimsan tahay danta guud ee ku jirta baahinteeda.

Qodobka 19aad: Aasaasida iyo Hawlaha Ha'yada Batroolka Soomaaliyeed (HBS)

1. Dhismaha HBS.

Sharcigan waxaa lagu dhisay Hay'adda nidaaminaysa hawlaha Batroolka, oo ah hay'ad loo dhan yahay laguna magacaabo Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed oo leh shakhsiyad qaanuuni ah, oo hoos imaanaysaa Wasaaradda;

2. Waqtiga Dhismaheeda:

b. Waxaa la dhisayaa HBS, waxayna awood u leedahay in ay ku dhaqaaqdo gudashada xilkeeda waqtiga la dhiso.

t. Waxaa lagu dhisayaa HBS ugu badnaan muddo 6 bilood gudahood ah, laga bilaabo maalinta uu sharcigan dhaqan galo.

3. Maamulka HBS

b. Maamulka HBS wuxuu ka kala imaanayaa, laba xubnood (2) oo matalaya Dawladda Federaalka, min hal xubin oo matalaya Dawladaha Xubnaha ka ah Dawlada Federaalka, kuwa ka mid noqon doona (markay dhismaan) iyo Gobalka Banaadir.

t. Xubnaha hay'adda waa inay noqdaan xubno aqoon uleh Maamulka, Dhaqaalaha, Bii'ada, Sharciga ama Batroolka laguna soo xulay xirfad, karti iyo hufnaan.

j. Dawladaha Xubinta ka ah Dawladda Federaalka waxay Wasaaradda u soo gudbinayaan xubnaha iyaga matalaya. Wasiirka ayaa u gudbinaya golaha wasiirrada soo jeedinta xubnaha matalaya Dawladda Federaalka iyo Dawladaha Xubinta ka ah oo wada jira, si loo ansixiyo.

x. Guddigu wuxuu haynayaa maamulka muddo afar sano ah, Dawladduna waa ka qaadi kartaa xilkooda hadday galaan xadgudubyo maamul, waqti kasta. Sababaha looga qaadi karo xilka waxaa ka mid ah, hadday xadgudub u gaystaan Qodobka 19.8, ama Qodobka 19.9. ama aanay buuxin karin shuruudaha xubinimada ee ku qeexan Qodobka 19.5.

4. **Shaqaalaha Hay'adda (HBS).** Xoghayaha Guud iyo shaqaalaha kale ee looga baahan yahay habsami u socodka hawlaha hay'adda waxaa magacaabaya guddiga maamulka ee HBS.

5. **Shuruudaha Guddiga Maamulka.** Qofka ka mid ahaanaya guddiga maamulka ee HBS lama magacaabi karo ama looma ogolaan karo xubinimo haddii aanu muwaadin Soomaali ahayn, ama uu yahay milkiile, saamile, agaasime, sarkaal, la wadaage ganacsi, iwm, oo ku dhex jira hawlaha wax soo-saarka, gaditaanka, iibinta, gudbinta, dhoofinta iyo keenista, iwm, ee la xariira arrimaha Batroolka ee wadanka ama haysta caddayn, ballanqaad la hubo oo waqtigiisu dheer yahay oo khidmad cayiman leh, ama ku lug leh cayminta shirkad ku hawlan shaqadan oo kale.

6. **Shuruudaha Shaqaalaha.** Qofka shaqaalaha ka mid noqonaya lama magaacabi karo ama looma ogolaan karo in uu sifadaas sii haysto haddii uu yahay milkiile, saamile, agaasime, sarkaal, la wadaage, iwm, oo ku dhex jira

hawlaha wax soo-saarka, gaditaanka, iibinta, gudbinta, isu-gudbinta, dhoofinta, keenista, iwm, ee la xariira hawlaha Batroolka ee Soomaaliya ama haysta caddaymo, ballanqaad la hubo oo waqtigiisu dheer yahay oo khidmad cayiman leh, ama ku lug leh cayminta shirkad ku hawlan shaqadan oo kale mid la mid ah.

7. **Guddoomiyaha Hay'adda.** Soojeedinta wasiirka kadib Xukuumaddu waxay u magacaabaysaa xubin ka mid ah guddiga maamulka in uu noqdo guddoomiyaha HBS, iyada oo xubin kale oo isla guddiga ka mid ah u magacaabaysa guddoomiye ku xigeenka. Guddoomiyahu waa sarkaal madaxeedka fulinta hawlaha HBS, wuxuuna kormeer iyo hagitaan ku leeyahay shaqooyinka iyo maamulka shaqaalaha hay'adda. Haddii xubinta guddoomiyaha ahi maqan yahay ama aanu awoodi karin in uu waajibkiisa guto ama uu banneeyo jagada uu hayo, guddoomiye ku xigeenka ayaa yeelanaya dhammaan awoodaha iyo xilalka guddoomiyuhu xambaarsanaa.
8. **Waajibaadka Feejignaanta.** Xubnaha iyo shaqaalaha HBS waxay waajibaadkooda u gudanayaan si daacadnimo ku jirto, shaqadoodana waxay u qabanayaan si sharciga waafaqsan oo aan dhinac-u-xaglin ku jirin kuna dheehan tahay daacadnimo, iyaga oo aan uga faa'iideysanayn jagooyinka ay hayaan in ay ku raadsadaan macaash aan sharciga waafaqsanayn.
9. **Sirta HBS.** Xubnaha guddiga maamulka iyo shaqaalaha HBS waxaa waajib ku ah in ay hawlahooda u qabtaan si sharciga waafaqsan, ilaaliyaanna xogta sirta ganacsi ee shakhsiyaadka iyo shirkadaha ay xog ogaal u noqdaan, markay HBS ku qanacsan tahay in:
 - b. Faafinta wararka loo filan karo inay keeni karto, khasaare maadi ah ama faa'iido shakhsiga ay saameeyaan hawlaha hay'adda si toos ah ama ay wax u dhinto heerka tartanka ee shakhsiga si macquul ah.
 - t. Nooca wararku ay yihiin kuwo ku saabsan dhinaca lacagta, ganacsiga, cilmiga ama farsamo oo loogu soo gudbiyey hay'adda xog ahaan, loona arkayey in ay sir u yihiin shakhsiga ay sida tooska ah u taabanayaan hawlaha HBS, isla markaana hay'addu u aragto in xajinta xogtaas ay ka weyn tahay danaha guud ee dhawrista mudan.

- 10. Xarunta Hay'adda HBS.** Xarunta dhexe ee HBS waxay noqonaysaa magaala madaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
- 11. Xafiis Goboleedka HBS.** Hay'addu waxay qiimaynaysaa hawlaha maamul ee la xiriira shakhsiyaadka hawlaha shidaal ka wada gudaha mid ka mid ah gobolada Soomaaliya:
- b. Haddii ay HBS ogaato in mugga shaqadaas ay qasbayso aasaasidda xafiis goboleed ay ku yeelato HBS gobolkaas, ama in xafiis goboleedkaas loo sameeyo wax ka badan hal gobol, waa inay sidaas ugu tala bixiso wasaaradda. Wasaaradda ayaa waxay markaas bixin kartaa fasaxa aasaasidda xafiis goboleedkaas, dawladda ayaana u magacaabaysa saddex xubnood oo ka mida HBS, kuwaas oo fariisin ka dhigan doona gobolkaas.
 - t. Laba ka mid ah xubnaha HBS ee gobolkaas waxaa laga dooranayaa liis ka kooban ugu yaraan shan qofood oo u qalma shaqadaas kartina u leh, kuwaas oo ay dawladdu u soo gudbiso gobolkaas.
 - j. Qodobada sharcigan ee ku saabsan magacaabidda, waqtiga, shaqa ka fariisinta, shuruudaha shaqa siinta, ilaalinta sirta iyo arrimaha kale ee la xiriira waxay si la mid ah ugu dhaqan gelayaan xubnaha HBS ee xafiis goboleedkaas ka hawlgala.
 - x. Arjiyada, fasaxyada, go'aannada, tilmaamaha ama amarrada laga rabo ama ay xaq u leedahay HBS inay maamusho, lana xiriira hawlgallada shidaalka ka socda gobol hoos yimaada xafiis goboleedka HBS ee loo sameeyay inuu ka shaqeeyo, waxaa maamulaya xafiiskaas iyo xubno goboleedka HBS, kuwaas oo shaqadan u gudanaya si waafaqsan xeerarka dhaqangalka ah iyo habraacyada HBS.
 - Kh. Marka uu gudanayo waajibkiisa, xafiis goboleedka HBS, wuxuu ilaalinayaa mabaadi'da qaran, siyaasadda, yoolalka iyo halbeegyada, isaga oo dhawraya habraacyada HBS.
- 12. Wajibaadka HBS.** Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed waxay nidaaminaysaa Hawlaha Batroolka si waafaqsan sharcigan ama sharciyada kale ee Soomaaliya;
- 13. Hawlaha HBS.** Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed waxay qabanaysaa hawlaha soo socda:

- b. Nidaaminta hawlaha Batroolka iyada oo loo marayo habka bixinta, ilaalinta, isbeddelka iyo dhaqangalinta ruqsadaha, iyo soo saarista go'aammo, amarro iyo tilmaamo iyada oo la cuskanayo sharcigan iyo xeer nidamiyeyaashiisa oo saldhig u ah hawlaha Batroolka si waafaqsan oo hoos imaanaysa qodobada isla sharcigan ku xusan.
 - t. Xaqiijinta kartida shakhsiyaadka ruqsadaha la siiyey, iyada oo aan cidna loo xaglinayn, lana hubinayo in shaqsiyaadkaasi ay ganacsi iyo dhaqaale ahaanba u dhisan yihiin aaminaadna galaan, leeyihiinna xirfad ay ku gutaan waajibaadkooda.
 - j. Hubinta shakhsiyaadka ruqsadaha la siiyey in ay fulinayaan una hoggaansamayaan sharciyada, go'aamada, amarrada ama tilmaamaha ka soo baxa HBS si waafaqsan sharcigan.
 - x. U kuurgalidda iyo la socodka arrimaha la xariira hawlaha Batroolka oo Wasaaraddu ka codsatay HBS in ay isha ku hayso, soona gudbiso' waqti ka waqti, warbixinno la xariira arrimahaas, talana ka soo jeediso tallaabooyinka hadba loo baahan yahay, iyada oo la eegayo danaha Qaranka ee la xariira ilaalinta iyo horumarinta ee qaybta Batroolka.
- Kh. Xukuumadda, iyada oo la raacayo talo soo jeedinta Wasaaradda, waxay u xilsaari kartaa HBS xilal dheeri ah oo la xariira nidaaminta, u kuurgalidda iyo gacan ku haynta hawlaha Batroolka iyo arrimiha kale ee la xiriira hawlaha hay'adda hadba sidii dan la moodo loona arko in ay habboon tahay.

14. Awoodaha HBS: Marka ay hawlaheeda u gudanayso si sharciga waafaqsan HBS waxay leedahay awoodaha soo socda:

- b. In ay bixiso Ruqsadaha Sahmineed si waafaqsan Qodobka 23.1.
- t. In ay gasho wadaxaajoodka
- j. In ay bixiso Ruqsado lagu ogolaanayo isticmaalka ku saabsan dhulka korkiisa si waafaqsan Qodobka 25.1.
- x. In ay ka cafiso culaysyada ku imaan kara Heshiisyada Wax-Soosaar Wadaagga si waafaqsan Qodobka 24.1. Shaqsigu ruqsadda haysta si waafaqsan Qodobka 34.

- Kh. In ay wax ka beddesho, ama la noqoto ruqsad kasta si waafaqsan sharcigan, xeerarka iyo qodobada ruqsadaha la bixiyey.
- d. In ay soo saarto, meel marisana, tilmaamo lagu hubinayo ku dhaqanka ruqsadaha la bixiyay.
- r. In ay waydiiso, dhagaysato, go'aanna ka gaarto dhacdo kasta oo ugu muuqata HBS in shakhsiga gudan waayo hawl, ama wuxuu farayey sharcigan, xeerarka ama Ruqsadaha, go'aannada, amarrada ama tilmaamaha la baxshay iyadoo la tixraacayo sharcigan iyo xeerarkiisa, ama lagu joojinayo meel marinta iyo sii socodsiinta shaqo kasta iyo waxyaalaha ka hor imaanaya sharcigan, xeerarkiisa ama wixii la mid ah oo ruqsad, sharci, go'aan, amar ama tilmaamo ah.
- sh. In ay amarto, ama weydiiso shakhsi kasta in uu sameeyo waqti kasta oo loo cayimo iyo si kasta oo HBS wax ugu sheegto shaqo kasta ama wax kasta oo shakhsigaas laga rabay in uu sameeyo isaga oo raacaya sharcigan, xeerarka ama sharci, go'aan, amar ama tilmaan kasta oo waafaqsan sharcigan ama xeerarka, ama lagu joojinayo meel marinta iyo sii socodsiinta shaqo kasta iyo waxyaalaha ka hor imaanaya sharcigan, xeerarkiisa ama wixii la mid ah oo ruqsad, sharci, go'aan, amar ama tilmaamo ah.
- dh. In ay uruuriso wixii xog ah iyada oo la tiigsanayo arrimaha kor ku xusan, taas oo ay ku jirto ku waajibinta shakhsi kasta oo ruqsad haysta in uu raaco amarrada dhiibista xogta.
- c. In ay qiimayso ciqaabaha ka dhalan kara ku xad gudubka ruqsad, go'aan, amar ama tilmaamo ay bixisay HBS, si waafaqsan cutubka 8aad.
- g. In ay la shaqayso si iskaashi leh hay'adaha shisheeye ee dhiggeeda ah, wasaaradaha ama waaxyaha mas`uulka ka ah nidaaminta hawlaha la xariira dawladaha deriska ah ee ku saabsan hawlaha Batroolka ama dhuumaha isaga gudba xuduudaha.
- f. In ay samayso qawaaniin ku salaysan Qodobada 19.17 iyo 19.18.
- q. In ay iskeeda ugu dhaqaaqdo baarista, dhageysiga iyo go'aaminta wax kasta oo sharcigaan iyo xeerarkiisa hoos yimaada, una baahan in la baaro go'aanna laga gaaro.

15. **Baaris.** Waxaa waajib ku ah HBS, in ay baarto ama abuurto xaaladdii lagu baari lahaa, si loo hubiyo in lagu xadgudbay qodob ama shardi muhiim u ah ruqsad la baxshay.
16. **Iskaashiga lala yeelanayo HBS.** Marka hay'addu iyo xubnaha guddigeeda maamuleed iyo shaqaaleheeduba gudanayaan waajibaadkooda sharciga ah, shakhsiyaadka iyo shirkadaha baaritaanka iyo kormeerka lagu samaynayo waa in ay gacan ku siiyaan bixiyaanna si hagar la'aan ah dokumintiyada iyo waxyaalaha laga dalbado. Shakhsiyaadkaas iyo shirkadahaas waa in aysan diidin la shaqaynta looga baahan yahay, kana hor imaanin kormeerada iyo baaritaanka, iskuna dayin in ay qariyaan dokumintiyada iyo waxyaalaha aasaasiga ah.
17. **Shuruucda Hawl Fulinta HBS.** Hay'addu waxay dejin kartaa, hadba sida ay ugu muuqato, kadib markay wasaaradda la tashato, wixii lagama maarmaan iyo lama huraanba ah ee la xariira gudashada waajibaadka iyo xilalka oo ay ku jirto soo saaris qawaaniin dalbaya ama reebaya dhaqanka ganacsi qaarkiis oo ku saabsan shakhsi ruqsad hasta, iyada oo looga jeedo in la hubiyo habsami u socodka hawlaha Batroolka ee Soomaaliya. HBS waxaa kaliya oo ay samayn karta qawaaniintaas kadib markay la tashato shakhsiyaadka ruqsada haysta ama shirkado iyo hay'ado ula muuqda in ay wakiilo u yihiin dad laga yaabo in ay shuruucdu saamayn ku yeeshaan. Shuruucda la soo saarayo oo la xariira isla faqraddan ma yeelan karto saamayn dib ugu laabasho ama wax ka beddelid maadi ah xagga qodobada ama shuruudaha ruqsad kasta la xiriira. Dib ugu laabashada iyo wax ka beddelidda ruqsadaha waxay dhici karaan oo keliya sida uu qeexayo Qodobka 34aad;
18. **Xeerarka habraaca ee HBS.** Hay'addu (HBS) waxay samaynaysaa xeerar ku saabsan qaab dhismeedka hay'adda, qaabka dalbashada ruqsooyinka, wakaalashada, cabashooyinka loo soo gudbinayo HBS iyo sida loo qaadayo dacwooyinka la hor keenayo, iyo habka loo qabanayo shaqo kasta ee HBS hor timaadda, iyo guud ahaan, sida HBS ay hawlaha u fulinayso, maaraynta arrimaheeda gudaha iyo waajibaadka shaqaaleheeda. Markay samaynayso xeerarkan, HBS waxay ku saleynaysaa mabaadi'da daahfurnaanta, hufnaanta, isla xisaabtanka iyo madax bannaanida;

- 19. Warbixin sanadeedka.** Markasta oo sannadka dhammaadkiisa la gaaro, lana dhaafin muddo ka badan lix bilood, HBS waxay wasaaradda u soo gudbinaysaa warbixin la xiriirta hawl qabadkeeda sanadlaha ah.
- 20. Xogta aan qarsoodiga ahayn.** Hay'adda (HBS) waxay dadweynaha u soo bandhigaysaa:
- b. Qawaaniinta lagu dhisay HBS ee ku xusan faqrada kala ah 19.17 iyo 19.18.
 - t. Go'aanada, amarrada iyo tilmaamaha HBS.
 - j. Ciqaabaha ay soo rogtay HBS.
 - x. Warbixinada guud ee HBS ee ku cad faqrada 19.19.
- kh. Qaababka ay yeelanayaan foomamka mid kasta oo ka mid ah ruqsadda Sahaminta, ruqsadda ka hawlgalka dhulka dushiisa iyo Heshiiska Wax-Soosaar Wadaagga.
- d. Ruqsooyinka ay bixisay HBS.
- 21. Doorka Wasaaraddu ku leedahay HBS.** Wasaaraddu waxay u jaangoynaysaa HBS siyaasadda guud ee hagaysa, wixii la xiriira qabashada hawlaheeda si waafaqsan sharcigan iyo xeerarka. Siyaasadda hagitaanka ee Wasaaraddu jaangoysa waxaa loo faafinayaa si la mid ah qaabka loo faafiyso shuruucda iyo arrimaha siyaasadda. Markay HBS fulinayso hawlaheeda si waafaqsan sharcigan iyo xeerarka, hay'addu waxay tixgelinaysaa talooyinka iyo tilmaamaha ka soo fula Wasaaradda. Wasaaraddu waa in aanay faragelin ku yeelan shaqo maalmeedka caadiga ah ee ku saabsan gudashada hawlaha HBS.
- 22. Racfaan.** Marka laga reebo sida ku cad faqradan, go'aan, amar ama tilmaan kasta oo ay gaartay HBS waa lagama noqdaan buuxa. Racfaan waxaa laga qaadan karaa arrin kasta oo ku saabsan go'aan, amar ama tilmaan uu horay u gaaray xafiis goboleedka HBS. Racfaanka waxaa loo qaadan karaa maxkamadda sare, marka uu ku saabsan yahay go'aan, amar ama tilmaan ay bixisay HBS kuna saabsan dhinacyada sharciga, xeerarka ama baaxadda masuuliyadeed ama gaboofal uu ku kacay xubin ka mid ah guddiga maamulka oo ka qayb qaatay go'aan gaarista, amar bixinta ama

tilmaanta iyo u hoggaansanaanta qawaaniinta habraaca hagar la'aaneed ee ku cad faqradda 19.23.

Racfaan laga ma qaadan karo go'aan kale oo ay HBS gaartay, meel kasta oo uu salka ku hayo. Codsiga Rafcaanka waa in la soo gudbiyaa 60 maalmood gudahood ka dib marka u soo baxo go'aanka, amarka ama tilmaanta laga qaadanayo Racfaanka.

23. Habraac cadaalad ah. Marka ay fulinayso hawlaheeda sida ku cad sharcigan ama xeerarka, HBS waxay:

b. Ku wargalinaysaa shakhsiyadka danaynaya arji kasta oo la qabto ama dhageysi kasta oo ay samaysay, iyada oo la raacayo qaabka uu jideeyey sharcigaan ama ay tilmaameen xeerarkiisa.

t. Diyaarisaa dhageysiyo la xariira bixinta, ka qaaddida ama ka joojinta ruqsadaha ku yimaada xaaladaha lagu sheegay sharcigan ama xeerarka.

j. Bixin kartaa qoraallo cadaynaya sababaha keenay go'aamadeeda, amaradeeda ama tilmaamaheeda, kuwaasoo loo arkaayey in ay habboonaayeen waqtiga la soo saaray go'aanka, amarka ama tilmaanta.

x. Ku salaynaysaa go'aanadeeda ku saabsan talaabooyinka ay qaaday, ammarada ama tilmaamaha ay bixisay dhagaysi ka dib, caddaymo, dood iyo xog la soo hordhigay dhagaysiga.

24. Canshuuro, Khidmado iyo Ganaaxyo. Wasaaraddu, iyada oo tixgelinaysa talooyinka HBS, ugana dan leh in ay soo ceshato dhammaan ama qaar ka mid ah kharashyada la galay, hadba sida ay go'aamiso hay'addu, iyada oo cuskanaysa masuuliyadda saaran, marka loo eego sharcigaan iyo xeerarkiisa, waxay ku soo rogaysaa shirkad kasta oo ruqsad haysata, si waafaqsan sharcigaan iyo xeerarkiisa, canshuuro, khidmado iyo ganaaxyo munaasib ah, iyadoo soo gudbinaysa habka loo xisaabay dakhliyadaas ka imaanaya shakhsiyadka iyo shirkadaha iyo qaabka ay ku bixinayaan lacagta.

HBS, waxaa kaloo ay qeexaysaa heerka ganaaxyada dheeriga ah iyo qaab xisaabeedka loogu go'aaminayo shakhsiyadka iyo shirkadaha inta ganaaxyada dheeriga ah ee kaga aaddan canshuuraha, khidmadaha iyo ganaaxyada aanay bixin markii laga rabay.

Qodobka 20aad: Dhismaha Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed (SHBQS)

1. Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed waxay leedahay shakhsiyad qaanuuni oo leh qaab shirkadeed.
 - b. Xarunta Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed waxay noqonaysaa magaalada madaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
 - t. Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed waxay leedahay, marka laga eego xagga awoodaha, dhammaan xuquuqaha, awoodaha, mudnaanta iyo karti-sharciyeedka ay leeyihiin shakhsiyad kale.
 - j. Sharcigaan waxaa lagu dhaqayaa Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed si la siman sida lagu dhaqayo shakhsi kasta oo ruqsad haysta, lana waafajinayo hadba duruufaha soo kordha ama xaaladaha isbedbeddala.
2. Ujeeddada Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed waa mid ganacsi oo ay kontroosho Dawladda, si ay u qabato hawlaha Batroolka. Shirkaddu waxay isticmaali kartaa xaqa ka qeybgalka ee ku cad Qodobka 35.1. Shirkaddu waxay heli kartaa ruqsad toos ah, ama mid la mid ah tan shirkadaha kale si waafaqsan habraaca tartanka ay soo bandhigtay HBS.
3. **Golaha Maamulka shirkadda.** Shirkaddu waxay yeelanaysaa gole maamul oo ka kooban Maareeye guud iyo laba xubnood oo ka socda Dawladda Federaalka iyo min hal xubin oo ka socda Dawladaha Xubnaha ka ah.
 - b. Shir gudoonka waxaa magacaabaya dawladda wuxuuna xilka haynayaa, markuu si fiican waajibaadkiisa u gudanayo, waqti kasta oo dawladda la habboon.
 - t. Maareeyaha guud waxaa magacaabaya xukuumadda soo jeedinta wasaarada kadib, wuxuuna xilka haynayaa, markuu si fiican waajibaadkiisa u gudanayo, waqti kasta oo xukuumadda la habboon. Waxaana xilka looga qaadi karaa sabab jirta. maareeyaha guud mar kale waa la soo magacaabi karaa marka xilligiisu/xilligeeda dhammaado.

j. Agaasimayaasha kale waxaa soo magacaabaya xukuumadda ka dib soo jeedinta wasaaradda waxayna xilka haynayaan muddo aan ka badnayn saddex sano si loo xaqiijiyo, intii la karo, in sanadkiiba aanu xilka ka dhamaan wax ka badan kala bar oo bar agasimayaasha. Agaasime kastoo kale dib ayaa loo soo magacaabi karaa marka xilligiisu/xilligeedu dhamaado.

x. Iyada oo la tixgelinayo Qodobka 20.3.kh, ma jiro qof xaq u leh in loo magacaabo ama u hayo xilka shir-gudoonka, jagada maareeye guud, ama agaasime haddii aan qofkaasi ahayn Soomaali.

Kh. Maareeyaha Guud waa sarkaal madaxeedka fulinta hawlaha shirkadda, wuxuuna awood u leeyahay, isagoo matalaya golaha maamulka, haggidda iyo maamulka hawlaha iyo arrimaha la xiriira shirkadda, isaga oo awood shaqo u leh arimaha aan ku jirin sharcigan ama xeer-hoosaadyada kale ama go'aanada gaar-ahaaneed ee uu sameeyo golaha maamulka shirkadda ama guddigeeda fulineed.

4. Kaalinta Golaha Maamulka SHBQS. Goluhu wuxuu hagayaa, maamulayaana hawlaha iyo arrimaha la xiriira SHBQS isaga oo go'aanno kusoo saari kara xeer-hoosaadyo lagu nidaaminayo hawlaha iyo arrimaha la xiriira SHBQS:

b. Goluhu wuxuu, go'aanno ku soo saarayaa xeer-hoosaadyo lagu nidaaminayo hawlaha iyo arimaha la xiriira SHBQS.

t. Goluhu wuxuu dhisayaa guddi fulineed, ama guddi kale oo kasta ama koox la talineed oo goluhu u arko in loo baahan yahay, wuxuuna cayimayaa inta ay ka kooban yihiin xubnahoodu, xilalkooda iyo mudada ay xilka haynayaan.

j. Goluhu wuxuu awood siin karaa, caddayn karaana xilalkooda iyo awooddooda guddiga fulinta si ay u qabtaan arrimo kasta oo aan ku jirin sharcigan ama xeer-hoosaadka ama go'aan, gaar ah, oo loogu tala galay in goluhu qaato.

x. Shir-gudoonku wuxuu ku dhaqmayaa awoodaha lagu qeexay xeer-hoosaadka shirkadda;

- Kh. Maareeyaha guud waa sarkaal madaxeedka fulinta hawsha SHBQS, wuxuuna hayaa, isagoo matalaya golaha, haggidda iyo maamulka hawlaha iyo arrimaha la xiriira SHBQS, isaga oo awood shaqo u leh arrimaha aan ku jirin sharcigan ama xeer-hoosaadka kale ama go'aanada gaar ahaaneed oo loogu tala galay in uu sameeyo golaha ama guddigeeda fulineed.
- d. Dawladdu waxay siin kartaa maareeyaha guud magac kasta oo ay isleedahay waa ku habboon yahay, ilaa iyo inta uu yahay sarkaal madaxeedka fulinta hawsha shirkadda.
- r. Haddii Maareeyaha Guud uu maqan yahay, ama aanu xilkiisa gudan karin, ama haddii xilka xafiisku bannaanaado, goluhu wuxuu magacaabayaa sarkaal ka tirsan shirkadda in uu si ku-meel-gaar ah u qabto xilka Maareeyaha Guud muddo aan ka badnayn sagaashan (90) cisho iyadoon la haynin ogolaanshaha xukuumadda.
- 5. Saraakiisha iyo Shaqaalaha Shirkadda.** Shirkaddu waxay qoran kartaa saraakiil iyo shaqaale, waxayna shaqo galin kartaa wakiilo, la-taliyayaal iyo talo-bixiyayaal ay u aragto in ay yihiin lagama maarmaan si loo fuliyo ujeeddada sharcigan iyo habsami u socodka hawlaha, SHBQS waxay kol walba caddaynaysaa shuruudaha iyo xaaladaha shaqaalayntooda ama qaadashadooda la xariirta.
- 6. Gunnooyinka Golaha Maamulka Shirkadda.** Shir-gudoonka iyo agaasime kasta, marka laga reebo maareeyaha guud iyo agaasime kale oo kasta oo ka mid ah shaqaalaha dawladda, waxay xaq u leeyihiin in shirkaddu siiso gunno ay xaddiday wasaaraddu inta ay ku hawlan yihiin shirarka golaha ama gudiyada golaha oo ay gudanayaanna waajibaadka sharcigu farayo.
- 7. Kharashka Agaasimayaasha SHBQS.** Agaasimayaashu waxay xaq u leeyihiin in SHBQS siiso sahay safar iyo kharash nololeedka ku baxaya marka ay gudanayaan waajibaadka shaqo uu sharcigu farayo inta ay uga maqan yihiin degaankooda shaqo rasmi ah.
- 8. Gunnooyinka Saraakiisha iyo Shaqaalaha SHBQS.** Saraakiisha, shaqaalaha, wakiilada, la taliyayaasha, iyo talo-bixiyayaasha waxay xaq u leeyihiin in SHBQS siiso gunnooyin, kharashyo, iyo manfacooyin ay SHBQS u xaddido.
- 9.** Haddii shakhsi ruqsadle ahi go'aansado in uu iska wareejiyo kulli ama qayb ka mid ah saamiga uu ku leeyahay ruqsadda, SHBQS waxay xaq uleedahay in ay kula wareegto qiimaha suuqa.
- 10. Shirkadaha Batroolka Dawlad Goboleedyada:** Waa shirkado ganacsi oo ka shaqeeya danaha dawlad goboleedyada ee ganacsi ee arrimaha shidaalka, waxayna dawlad goboleedyada u matalaan saamiga ay ku leeyihiin SHBQS, shaqadooduna noqonayso dhisidda iyo maamulidda kaabayaasha shidaalka ee heer dawlad goboleed iyo suuq gaynta cadadka shidaalka ee wadanka gudahiisa lagu isticmaalayo, iyada oo aan wax loo dhimayn mabaadi'da suuqa xorta ah.

Qodobka 21aad: Xadidaada Xuquuqda Saraakiisha Dawladda.

1. Xadidda iska Horimaadka Danaha Gaarka ah.

Saraakiisha dawladdu ma heli karaan, iskumana dayi karaan in ay helaan ama haystaan:

b. Ruqsad ama ku hammin dan gaara, ha ahaato mid toos ah ama dadban, oo la xiriirta ruqsad.

t. Saami uu ku yeesho shirkad haysata ruqsad, ama mid iyada ku laran.

2. **Waxa ka dhalan kara Xadgudubka.** Qaab kasta oo wax lagu siiyo ama loogu doodo in loogu ogolaado sarkaal dawladeed, wax dan gaar ah u muuqda, si toosan ama dadban, oo la xiriirta ruqsad, loona arki karo siismo aan sharci ahayn, waa wax kama jiraan;

3. **Ehelada.** Helitaanka ama haysashada, ruqsad, ama yeelashada dan ama saami, oo la xiriirta carruurta aan qaan gaarin ama xaasaska saraakiisha dawladdu, waxaa loo arkayaa mid uu helay ama haysto sarkaal dawladeed,

4. **Aan ka ahayn.** Saraakiisha dawladda, oo ah Agaasimayaasha, shaqaalaha ama talo-bixiyeenada Shirkadda oo dan ku leh ruqsad ay haysato shirkaddu laguma dabiqi karo faqrada kor ku xusan ee Qodobka 21aad.

Qodobka 22aad: Naqshadeyn.

Iyada oo la raacayo ujeedada sharcigaan, Dhulka Soomaaliyeed, ama qaybo ka mid ah, waxaa loo qaybinayaa xirmo-xirmo si waafaqsan habka iyo shuruucda caalamiga ah ee xadidaadda xirmooyinka.

CUTUBKA 3AAD –RUQSADAHA HAWLGALLADA BATROOLKA

Qodobka 23aad: Ruqsada Sahanka Indha-Indheynta

1. **Awoodda Bixinta.** Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS) waxay siin karta Ruqsad Sahamineed, oo la xiriirta goob cayiman, qof qaanuuni ah ama koox shirkado ah.
2. **Xuquuqaha Ruqsadda Sahminta**
 - b. Ruqsad Sahmineed waxay oggolaanaysaa in lagu sameeyo baaritaan ah geological, geophysical, geochemical iyo geotechnical oo ku saabsan ruqsadda aagga la baxshay.
 - t. Ruqsadda Sahmintu waxay faraysaa Shaqsiga ruqsadda haysta in uu soo sheego horumarka iyo natijada baaritaanka, uuna xajiyo sirta arrintaas la xiriirta.
 - j. Ma jirto in ruqsad sahmineed marnaba u oggolaanaysa Shaqsiga haysta inuu ceel qodo, ama uu ugu xagliyo, kuna yeesho xuquuq uu uga mid noqon karo Heshiis Wax-soosaar Wadaag ah.
3. **Ruqsadaha Isdul-fuula.** Inta aan lagu bixin Ruqsad Sahmineed goob horay ruqsad loogu haystay, HBS waxay qoraal ogaysiin ah siinaysaa qofkii horay u haystay ruqsadda.
4. **Tanaasulid iyo Joojin.**
 - b. Shakhsiga haysta Ruqsadda Sahminta wuxuu iska celin karaa ruqsadda, markuu doono, isagoo qoraal wargalin ah siinaya HBS, waxaana shardi ah in Ruqsad haystuhu oofiyey dhammaan waajibaadkii saarnaa.
 - t. Haddii Ruqsad Haystuhu uusan buuxin shuruudihii ku xirnaa Ruqsadda Sahminta, HBS way ka joojin kartaa ruqsadda sahmintu Shaqsiga ruqsadda haysta, kadib markay siiso waqti cayiman oo u ku saxo shardiga uu jebiyey.

Qodobka 24aad: Heshiyada Wax Soo Saar Wadaagga

1. **Awoodda Bixinta.** Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS) waxay la gali kartaa wada xaajood Heshiis Wax-Soosaar Wadaag oo ku saabsan goob cayiman, qof ama koox dad ah, ka dib markay cadaato in shakhsigaas ama kooxdaasi ay galeen heshiis wadashaqayn iyadoo ay oggolaatay HBS, sida ku cad Qodobka 31.1. Heshiis kasta oo Wax-Soosaar Wadaag ah waxaa saxiixaya Wasiirka, kaddib soo jeedinta HBS.
2. **Qaabka Loo Noqdo Qandaraasle.** Si uu ugu qalmo in uu galo Heshiis Wax-Soosaar Wadaag, Shaqsiga waa:
 - b. In uu haystaa, ama uu heli karaa, awood dhaqaale, aqoon iyo karti xirfadeed, si uu u fuliyo hawlgallada Batroolka ee aagga qandaraaska lagu bixiyey.
 - t. In uusan lahayn taariikh xun ee muujinaysa ku dhaqmid la'aan mabaadii'da wanaagsan ee qoysnimada ka dhaxaysa shirkadaha Batroolka. j. In ay tahay shirkad leh mas'uuliyad xaddidan ama dad sidaas oo kale u leh mas'uuliyad kooban.

x. In uu ku jiraa caymis caalami ah oo u qalma hawlgallada Batroolka ee ruqsadiisa ku cayiman.

3. Keli-Lahaansho

- b. Iyada oo aan waxba loo dhimayn Qodobka 25, ama xaqa HBS u leedahay in ay bixiso Ruqsad Sahmineed, Heshiiska Wax-Soosaar Wadaaggu wuxuu siinayaa qandaraaslaha xaqa kali-lahaansho si uu qabto hawlgallada Batroolka ee aagga qandaraaska lagu siiyey.
- t. Heshiiska Wax-Soosaar Wadaagu waxuu ku kali ahaan karaa saliidda ceyriin, gaaska dabiiciga ah ama qaybaha kale ee Batroolku ka samaysan yahay.
- j. Qandaraaska bilawga ah ee goobta qandaraaska lagu bixiyey kuna salaysan Heshiis Wax- Soosaar Wadaag kama badnaan karo 5,000 km².

4. Ogeysiin Helitaan Batrool.

- b. Qandaraaslahu wuxuu HBS ku siinayaa qoraal ogeysiin ah afar iyo labaatan (24) saac gudahood markasta oo batrool laga helo goobta uu ruqsadda u haystay.
- t. Qandaraaslahu waa in uu gudbiyaa warbixinnada la xiriira helitaanka Batroolka oo HBS codsatay.

5. Barnaamij Shaqo, Qorsho iyo Misaaniyadeed. Heshiiska Wax-Soosaar Wadaaggu wuxuu ku waajibaad yeelayaa qandaraaslaha inuu fuliyo, hawlgallada Batroolka si waafaqsan, kana baxsanayn barnaamijka shaqo, qorshaha iyo miisaaniyadda ay oggolaatay HBS.

6. Qodobada looga baahanyahay Heshiiska Wax-soosaar Wadaagga: Heshiiska Wax-Soosaar Wadaaga waxaa ku jira shuruudo qeexaya arrimaha soo socda:

- b. Waajib shaqo midka ugu yar oo la qaban karo inta lagu jiro mudada baaritaanka ee ku cad Heshiiska Wax-Soosaar Wadaagga.
- t. Ka tanaasulid qaybo ka mid ah goobta qandaraaska lagu haysto inta marxaladda baaritaanka lagu jiro.
- j. Qaab xisaabeedka royaltiga iyo qaybsiga Batroolka ka dhaxeeya qandaraaslaha iyo Dawladda Federaalka Soomaaliya;
- x. Hadday ku haboon tahay, leedahayna, sifo maaliyadeed oo ka duwan royaltiga iyo qaybsiga Batroolka, oo ay ku jiraan xurmo (bonus) la xiriira saxiixa iyo wax soo saarka.
- kh. Sharciyo degaan oo qeexaya sida loo ilaalinayo loona kaydinaayo bi'ada.
- d. Hadday ku haboon tahay, waajibaad dhigaya shidaal siinta suuqa gudaha Soomaaliya, gaar ahaan, marka ay jiraan xaalado degdeg ah.
- r. Tababarada iyo shaqo siinta muwaadiniinta Soomaaliyeed.
- s. Doorbididda isticmaalka qalabka iyo adeegyada laga heli karo Soomaaliya gudaheeda.

sh. Hadday ku habboon tahay, sugidda iyo hubinta xasiloonaada maaliyadeed iyo heshiisyadaba.

dh. Dhaxdhaxaadin Caalami ah.

7. Canshuuraha hoos taga Heshiiska Wax-soosaar Wadaagga:

Canshuuraha hoos yimaado Heshiiska Wax-soosaar Wadaagga waxaa lagu qeexayaa sharci gaar ah iyada oo la waafajinayo hanaanka maaliyadeed ee dalka.

8. Tanaasul iyo Joojin

b. Haystaha Heshiiska Wax-Sooaar Wadaaggu waa iska celin karaa heshiiska, waqtiga uu doono, isagoo qoraal wargalin ah siinaya HBS, iyadoo shardi looga dhigayo in Ruqsad Haystuhu fuliyey dhammaan waajibaadkii saarnaa.

t. Haddii Ruqsad Haystuhu aanu u hoggaansamin shuruudaha ku xiran Heshiiska Wax-Sooaar Wadaaga, HBS waxay awood u leedahay in ay qoraal wargelin ah kaga joojiso heshiiska, qandaraaslaha uu quseeyo, ka dib markay Ruqsad Haystaha siiso waqti macquul ah oo uu ku saxo xaaladda.

9. Shakhsiga ruqsadda la siiyay waa in uu xafiis ku lahaadaa Soomaaliya si uu ugu fuliyo hawlaha Batroolka, wuxuuna yeelanayaa wakiil u xilsaaran xafiiska oo leh awood buuxda oo uu ku hawlgeli karo, kuna geli karo asaga oo wakiil ka ah Shaqsiya ruqsadda la siiyay ballanqaadyo fulintoodu ay waajib tahay. Shakhsiga ruqsadda la siiyay waa in uu ka furtaa xisaab socota bangi ku yaal Soomaaliya.

Qodobka 25aad: Ruqsadaha ka Hawlgalka Dhulka Dushiisa.

1. Awoodda Bixinta

b. HBS waxay siin kartaa qof ama koox dad ah ruqsad ku dhaqan dhuleed, oo la xariirta aag cayiman.

t. HBS ma bixin karto ruqsad ku dhaqan dhuleed oo aag ku saabsan, kaasoo ku haysta Heshiis Wax-Sooaar Wadaag ama Ruqsad Sahmineed, ilaa iyo inta la tixgelinayo dhammaan codsiyada ka yimid ruqsad haystayaasha si muujinaysa in aysan jirin faragelin xadgudub ku ah xuquuqda uu leeyahay Shaqsi kale oo ruqsad haysta.

2. Xuquuqaha la Bixiyay

b. Inta ay jirto, ruqsad ku dhaqan dhuleed oo u oggolaanaysa ruqsad haystaha inuu sameeyo mid ama ka badan arrimaha soo socda:

- i. In uu dhiso, rakibo kuna shaqeeyo dhismooyin, kaabayaal iyo qalab kale.
- ii. Hawlo kale qabto, sida ku cad ruqsadda goobta loo oggolaaday.
- iii. Ma jirto ruqsad ku dhaqan dhuleed oo oggolaanaysa in ruqsad haystuhu ceel qodi karo.

3. Tanaasul iyo Joojin

b. Ruqsadda ku Dhaqanka dhulku:

- i. Waa ka tanaasuli karaa ruqsad haystuhu, isagoo qoraal ku wargelinaya HBS, taasoo lagu xirayo in ruqsad haystuhu fuliyo dhammaan waajibaadkii saarnaa.
- ii. Way joojin kartaa HBS, waqtikastaba, iyadoo qoraal wargelin ah siinaysa ruqsad haystaha, haddii uu san buuxin shuruuduhii ku xirnaa Ruqsadda, ka dib markay ruqsad haystaha siiso waqti macquul ah oo uu ku saxo xaaladda.
- t. HBS waxay u gudbinaysaa qoraal looga soo celinayo ama lagu dhamaynayo ruqsadda uu haysto qofku, kaas oo aaggiisii ka socdaan hawlo la oggolaaday in lagu fuliyo ruqsadda u oggolaanshaha dhulka korkiisa ee markaas laga hadlayo.

4. Isku Xirka Hawgalinta. HBS waxay tilmaan siinaysaa haystayaasha ruqsadda dhul ku dhaqan ka iyo Shaqsiyaadka kale ee ruqsad haysta ee ku saabsan isku duba-ridka hawlgallada Batroolka oo ay ka wada siman yihiin.

Qodobka 26aad: Bandhig Codsii

1. Dalabyada Ruqsadaha (Ogolaanshaha).

b. HBS waxay ku soo bandhigaysaa ogeysiis guud in loo soo qorto araaji codsii ruqsado, taasoo loo arko in ay tahay habka ugu wanaagsan oo ruqsadahaas lagu bixin karo.

t. Iyadoo aan la raacin Qodobka 26.1.b, HBS waxay door bidi kartaa in ay ruqsado ku bixiso wada hadal toos ah, iyadoo aan soo bandhigin ogeysiisyo guud, hadday ku jirto dan guud oo sidaas waajib yeelaysa, kuna fadhida tilmaanta Wasaaradda ama Dawladda.

j. Haddii ay HBS bixiso ruqsad, iyadoo aan soo bandhigin in loo soo gudbiyo dalabyo, waa in ay u gudbisaa Wasaaradda iyo Xukuumadda sababta ay sidaas u samaysay.

x. Dalabyada ama araajida waa in lagu soo gudbiyaa luqadda rasmiga ah ama luuqadda labaad ee dalka ama, hadday dhacdo in ay ku qoran tahay luqad kale, waa in ay la socotaa tarjumaad rasmi ah oo ku qoran luqadda rasmiga ah ama luuqadda labaad ee dalka, waana in lagu soo ridaa laguna soo gudbiyaa baqshad xiran.

2. Qodobada soo Bandhigga Dalabyada

b. Codsiga dalabyada la soo bandhigo waa in ay ku cadahay aagga laga hadlayo, shaqooyinka la damacsan yahay, qaabka arjiyada loo xulayo, ujuurada lala dhiibi doono arjiga, waqtiga, iyo habka araajida loo samaynayo, lagana dhigo tartan furan.

t. Haddaan codsiga dalabyada si kale u sheegin, HBS waxay dooran kartaa in aysan siin ruqsad cid kastoo soo doonata.

3. Qodobada Arjiga ku Qoran.

b. Arjiga ruqsadda waa in ay ku jirtaa soo jeedimo ku saabsan:

i. Xaqiijinta caafimaadka, nabadgelyada iyo daryeelka dadka ka shaqeeya ama kuwa ay wax ka soo gaaraan hawlgallada Batroolka.

ii. Dhawrida degaanka (Bii'ada), lagana hortago, lana yareeyo ama dib looga nadiifiyo wasakhaynta iyo dhibaatooyinka kale ee bii'ada uga imaanaya hawlgallada Batroolka.

iii. Tababaridda loo fidinayo shaqaalaha, iyadoo mudnaan gaar ah la siinayo kuwa ka shaqeeya hawlgallada Batroolka, iyo guud ahaan muwaadiniinta Soomaaliyeed.

iv. Isku taxallujinta manaafacaadsiga loo fidinayo bulshada ku dhaqan aagga ruqsadda lagu bixiyay iyo yaraynta, iyo ka hortagga saamayn kasta oo dhimaal leh oo ay hawlgallada Batroolku ku keeni karaan aagga ruqsadda.

i. Badeecooyinka iyo adeegyada loo baahan yahay, waa in laga gataa dadka degan gudaha Soomaaliya;

4. Tixgelinta Arjiyada. HBS ruqsad dhul ku saabsan ma bixinayso, tan iyo inta ay tixgelin ka siinayso dhammaan araajida la soo hordhigay oo jawaabta u baahan, xurmaynaysana codsiyada dalabyada loo soo wada gudbiyey.

Qodobka 27aad: Guud ahaan Hawlgallada Batroolka

1. **la-Isticmaalka dhinac Saddexaad.** Heshiis kasta oo Wax-Soosaar Wadaag ah iyo Ruqsad ku Dhaqan dhul, waxaa shardi ah inuu ogolaado la-isticmaalka dhinac saddexaad marka loo baahdo iyadoo sababo macquul ah loo cuskanayo.
2. **Wadar iyo Keli Keli.**
 - b. hadii ay jiraan hal Shaqsi wax ka badan oo wada haysta hal ruqsad oo cayiman, waajibaadyada iyo qaamaha dul fuulaya Shaqsi oggolaansho ruqsadeed haysta waxay la mid yihiin kuwo saaran dhammaantood, wadar ahaan iyo keli keliba.
 - t. Marka laga hadlayo Heshiiska wax-Soosaar wadagga, SHBQS iyo qandaraasle kasta oo ay dawladdu leedahay, waxaa HBS ka dhaafi kartaa shuruudaha lagu soo bandhigay Qodobka 27.2.b.
3. **Waxa ka Imaanaya ku Xadgudubka Sharciyada.** Ruqsad la baxshay, waa waxba kama jiraan hor iyo horaanba, haddii lagu helay ku xadgudub sharciyada Soomaaliya, oo ay ku jiraan kuwa la xariira musuq maasuqa.

Qodobka 28aad: Ilaalinta degaanka (Bii'ada).

1. **Waajibaadka wax ka Qabashada degaanka.** Shaqsigu ruqsadda haysta ee wada hawlgallada Batroolka waxaa laga rabaa:
 - b. In ay ka hortagaan wax u dhimidda Bii'ada.
 - t. In ay iska ilaaliyaan in khasaare loo gaysto Batroolka.
 - j. In ay ka hortagaan wixii dhib ah iyo khasaare oo loo gaysan karo xirmooyinka dhulka hoostiisa oo Batroolku fadhiyo.
 - x. In ay ka hor tagaan wasakhaynta Bii'ada iyo macno daro u isticmalka qaab dhismeedyada dhulka, ilaha iyo ceelasha biyaha nadiifta ah ku jiraan, dalagyada, xoolaha iyo nafley-badeedka.
 - kh. In ay ka hor tagaan inuu Batroolku ku fakado deegaanka, isagoo maraya marinno ama fogeeyayaal aan la hubin.
 - d. In ay la yimaadaan barnaamijyada nadiifinta deg degga ah iyo hababka loo raacayo.
 - r. In ay sameeyaan, waqtiyada ay ku haboon tahay, cilmibaaris deegaan oo saldhig ah inta aan la bilaabin hawlgallada Batroolka, qiimaynta iyo raadka ay deegaanka ku reebayso hawl kasta oo Batroolka la xariirta.
 - s. In ay isticmaalaan, habka wanaagsan ee hawlgalka ceelasha Batroolka, marka dib loo soo noolaynayo deegaan, dhammaadka hawlgallada la xariira Batroolka.
 - sh. Inay abuuraan sanduuqa khasaaraha wasakhda si loogu nadiifiyo

oo dib loogu soo nooleeyo goobta wasakhdu khasaaraha u geysatay.

2. **Xeerarka Nidaamiya degaanka.** Wasiirka waa inuu soo saaraa xeerar si cad oo buuxda u qeexaya waajibaadyada saaran shakhsiga ruqsadda haysta sida ku soo aroortay Qodobka 28.1.
3. Dacwada magdhawga ee la xiriirta khasaaraha wasakheynta waa in la horgeeyo maxkamadda awoodda u leh.

Qodobka 29aad: Soo Celin iyo Magdhaw

1. **Shuruudaha Lagu Helo Ruqsadda.** Qofna kama samayn karo hawlgal Batrool dhulka Jamhuuriyadda Soomaaliya gudahiisa, marka laga reebo ruqsad daba joogta ruqsad kale oo waafaqsan sharcigan ama xeerarkiisa.
2. **Dib u Celin.** Iyadoo aan loo eegayn wax masuuliyad dambiyadeed oo uu leeyahay shakhsiga qabta hawlo Batrool oo ka duwan habka ruqsadu ogoshahay waxaa laga doonaya:
 - b. In uu dib ugu soo celiyo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya lacag u dhiganta qiimaha suuqa uu ka joogo Batroolka la hormariyey, ama la soo saaray ama la dhoofiyay, iyada oo ay la socoto khidmadaha lacag bixintii u dambaysay oo heerkeeduna aan ka badnayn midka ay jidaysay Wasaaraddu.
 - t. In ay qiyaasto, qiimaha dhammaan dhismayaasha iyo qalabka loo isticmaalay in lagu fuliyo hawlgallada Batroolka, ama ay furfurto oo meesha ka qaado dhismayaashaas iyo qalabkaas, ama ay dhabarka u ridato bixinta kharasha ku baxaya furfuridooda iyo qaadidooda;
 - j. In ay nadiifiso, wasakhda ka timid hawlaha Batroolka ama ay u celiso Soomaaliya kharashka nadiifinta ku baxaya.

3. Baaxadda Tirada.

Qaamaha ku cad Qodobka 29.1 waxay u dabaqneysaa si iskuduub ah; haddii kale, waxay noqonaysaa mid ay go'aamiso HBS hadba sida ay dan mooddo, iyadoo loola jeedo in Soomaaliya aysan hoos uga dhicin meesha ay mudnaan lahayd, haddii hawlgallada Batroolka ee la guda galay loo fulin lahaa sidii la rabay, iyadoo la tixraacayo ruqsadda la bixiyey.

4. Qaan Wadareed iyo Mid Keli Keli ah.

Qaamaha ku cad Qodobka 29.1 oo ay wada galeen Shaqsigu hawlgallada Batroolka ku wada jira ama horay ugu wada jirey, waa qaamo loo haysto dadka ay khusayso wadar ahaan iyo keli keliba.

Qodobka 30aad: Xaddidaadda Adeegsiga Xuquuqda

1. Magdhow Munaasib u ah Mulkiilaha Dhulka

- b. Shaqsiga ruqsadda haysta kuma isticmaali karo, marnaba, xuquuqda la siiyey ee ku cad ruqsadda ama sharcigan hadday taabanayso:
 - i. Hantida guud ee ma guuraanka ah, haddii aan ogolaansho looga helin HBS.
 - ii. Hantida gaar ahaaneed ee ma guuraanka ah ee dalka, haddii aan ogolaansho looga helin HBS.
 - iii. Hantida gaar ahaaneed ee ma guuraanka ah, iyadoo aan la siin mulkiilaha magdhaw munaasib iyo macquulba ah, oo ay xaddiday HBS.
- t. Mulkiilaha hantida ma guurtada ah ee ku taal goob ruqsad lagu baxshay wuu haysanayaa xuquuqdiisa isticmaalka dhulka, haddii isticmaalkaasi uusan faragelin ku sameyneynin socodsiinta hawlgallada Batroolka.
- j. Ruqsadi waa xaddidi kartaa ama si la mid ah waa u kontrooli kartaa Shaqsiga ruqsadda haysta ee isticmaalaya kaabayaasha dawladda, iyo khayraadka kale ee dabiiciga ah oo ay ka mid yihiin geedaha, carrada, jayga, dhagaxa, biyaha, iwm.
- x. Ruqsadi ma aha mid ridaaysa waajibaadka looga raadsanayo masuuliinta xilku saaran yahay ogolaansho qoraal ah, marka laga reebo arrimaha sida gaarka ah ruqsadda loogu caddeeyey.

2. Inaan Faragelin Lagu Samaynin Hawlaha Sharciga ah ee Badda ka Socda. Shakhsi ruqsad haystaa uma isticmaali karo xuquuqda ku cad ruqsadda, ama sharcigan iyo xeerarkiisa, si faragalin ku ah kalluumaysiga, badmareenimada ama hawl kasta oo badda laga hayo ee sharci ah, iyadoo aan oggolaansho qoraal ah laga helin mas`uuliyiinta awoodda u leh.

3. Magdhawga Carqaladaynta ku Saabsan.

- b. Shaqsiga ruqsadda haystaa, wuxuu mas`uul ka yahay bixinta magdhaw caadil ah oo macquul ah oo ay qeexday HBS, haddii inta ay socoto hawsha Batroolku uu:
 - i. Carqaladeeyo, xuquuqda Shaqsi iska leeyahay oo ku saabsan hanti maguurto ah, ama uu wax yeellayn gaysto;
 - ii. Ku sameeyo, si muuqata, faragalin kaluumaysiga, badmareenimada ama hawl kasta ee badda laga hayo oo sharci ah.
- t. Haddii qiimaha xuquuqdu ay kordhiyaan hawlgallada Batroolka, magdhawga xuquuqdaas laga bixinayaa, waa in aanu ka badnaan qiimaha markasta la bixin lahaa haddiiba laga soo qaado in aanu qiimuhu kordhin.

4. Magdhow ku habboon oo macquul ah. Waxa noqon kara magdhow munaasib iyo macquulba ah, sida ku cad Qodobka 30aad, waxaa goynaya HBS, ka dib markay tixgeliso cabashooyinka dhinacyada danaynaya arrintaan.

4. Magdhowga Carqaladeynta. Haddii Shaqsi ruqsadda haysta uu bixin waayo magdhawga laga dalbay ayadoo la raacayo faqradda (2aad), ama uu milkiilahu ama haystahu uu ku qanci waayo qaddarka magdhawga loo soo jeediyay, milkiilaha ama haystaha wuxuu dacwo ka oogi karaa maxkamadda degaanka ee awoodda u leh go'aan ka gaarista iyo hanashada magdhawga (haddiiba uu jiro) ay u badan tahay in la bixiyo iyada oo la raacayo faqraddan, soddon (30) cisho gudahood ee ka billaabnaysa taariikhda la sameeyay dalabka magdhawga ama la soo jeediyay magdhawga.

Qodobka 31aad: Ansixinada Hayada Batroolka Soomaliyeed

1. Ansixinta Heshiisyada. Heshiis wada shaqayneed, is afgrashooyinka dhoofinta iyo heshiis kasta oo la xiriira hawlgallada Batroolka, iyo sidoo kale isbedello kasta oo ku yimaada heshiisyadaas, waa in ay marka hore soo helaan ogolaanshaha HBS. Hay'adda (HBS) waa in ay ansixisaa heshiisyada noocaas oo kale ah ama isbedellada, iyada oo hubinaysa in ay la socon karaan shuruudaha ruqsadaha, sharciga iyo xeerarkiisa.

2. Ansixinta Isbeddellada Kontroolka

b. Dhammaan isbeddellada ku yimaada kontroolka shakhsiga ruqsadda haysta, waa in uu marka hore helaan ansixinta HBS.

t. Meesha uu ka dhaco isbedel kontrool isagoo aan marka hore haysan ansixinta HBS, hay'addu way joojinaysaa meel marinta ruqsadaas iyada ah.

j. Iyadoo la fulinayo ujeedooyinka Qodobka 31.2.1, isbeddel Kontrol waxaa ka mid ah Shaqsi joojiyey inuu lahaado Kontroolka (ha yeesho ama yuusan yeelan kontroolka Shaqsi kale) iyo qof lahaaday kontroolkaa isaga ah (ha yeesho ama hore ha u lahaadee kontroolka qof kale).

3. Ansixin kala wareejin. Iyada oo aan qoraal ogolaansho laga haysanin HBS (kaasoo aan sabab la'aan la hakin karin ama la daahin karin), ama si cad ugu qeexan shuruudaha ruqsadda, ma jiri karo u xilsaarid, wareejin, gudbin, cusboonayn, iskudar, rahmid, ama macaamil kaloo la mid ah oo la xiriira ruqsadda, oo noqon karta dhaqangal ama lahaan karta raad midna. Xeerarku waa in ay qeexaan habka ay HBS u qiimaynaysa ku haboonaanta oggolaanshaheeda.

Qodobka 32aad: Heshiiska Mideynta

4. Mideynta

- b. Haddii ama markii hara Batrool la helo oo qaarkeed ku yaal gudaha aag qandaraas lagu galay, qaar kalana ku yaal aag qandaraas kale lagu galay:
 - i. Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS) waxay dalab qoraal ah ku codsan kartaa, in qandraaslayaashu la galo midba midka kale heshiis midayn ah si loo xaqiijiyo waxtarka iyo sare u qaadidda wax soosaarka Batroolka ku jira harada.
 - ii. Haddii aan heshiis la gaarin sided iyo toban (18) bilood gudahood, laga bilaabo, marka la helo qoraalka dalabka ah sida uu dhigayo Qodobka 32.1.b.i, HBS ayaa go'aan ka gaaraysa heshiiska midaynta.

- t. Haddii ama markii kayd Batrool la helo uu qaarkiis ku yaal gudaha aag qandaraas lagu galay, qaar kalana ku yaalla aagga heshiis wax-soosaar qaybsi aan ku jirin:
 - i. Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (H.B.S) waxay codsan kartaa si qoraal ah, in qandraaslahu la galo heshiis midayn ah HBS, si loo xaqiijiyo wax tarka iyo sare u qaadidda wax-soosaarka Batroolka ku jira harada.
 - ii. Haddii aan heshiis la gaarin siddeed iyo toban (18) bilood gudahooda, laga bilaabo marka la helo qoraalka dalabka ah, sida ku cad Qodobka 32.1.2.1, HBS ayaa go'aan ka gaaraysa heshiiska midaynta, haddii aan si kale loogu caddayn Heshiiska Wax-Soosaar Wadaagga.

- 5. **Heshiis Midayn.** Iyadoo aan la xadidayn arrimaha la cadaynayo, heshiiska midayntu waa in uu qeexaa inta Batrool ku jirta mid walba oo ka mid ah aagagga heshiiska midayntu daboolayo, waana in uu magacaabaa hawl-fuliyaha mas`uulka ka ah soo saarista Batroolka heshiiska midayntu sheegayo.
- 6. **U Baahnaan Ansixin.** Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS) waxay oggolaan kartaa sii wadidda horumarinta ama wax-soosaarka haro qaarkeed ka mid yahay aag qandaraas lagu bixiyay sida ku cad Qodobka 32.2, keliya marka la ansixiyo ama go'aan laga gaaro heshiiska midaynta.
- 7. **Ansixin Isbeddello.** Isbedel kasta oo lagu samaynayo heshiiska midaynta waa in uu marka hore haysto ansixinta HBS.

Qodobka 33aad: Xallinta Khilaafaaka

1. Kaalinta HBS ee La Xariirta Khilaafaadka

- b. HBS way baari kartaa go'aanna way ka gaari kartaa dhammaan khilaafyada la xariira ashakhaasta ku hawlan shaqooyinka Batroolka, ha ahaadeen kuwo:
 - i. Iyaga dhexdooda ah, marka heshiiskoodu uusan qeexayn habka loo xallinayo khilaafaadka.
 - ii. La xariira qolo saddexaad (oo aan ahayn dawladda), oo aan sidaa isla markaana ugu xirnayn, ilaa iyo inta ay qoladaas saddexaad aqbalsan yihiin xukunka HBS ee xallinta khilaafaadka.
- t. HBS way diidi karta in ay go'aan ka gaarto khilaafaad kasta oo loo soo gudbiyo, hadday sidaas samaysana, waxay qoraal ahaan ku ogeysiinaysaa qolooyinkii khilaafaadku ka dhexeeyey.
- j. HBS, iyadoo tixgelinaysa dhammaan xaaladaha muhiimka ah ee jira, waxay talo ku bixin kartaa tilmaan kastoo loo baahdo si go'aankeedu ugu yeesho saamayn dacwadaha socda, sida ku cad qodabka 20aad, uuna ka mid yahay, ku amridda bixinta kharaj celin oo qolo khilaafaadka ka mid ah u celinayso qolo kastoo kale oo khilaafka iyaduna ka mid ah, hadba sidii munaasib iyo maangal noqon karta.

2. khilaafaadka la Xariira Dib u Oggolaanshaha

- b. Haddii khilaaf dhasho, la xariira fasiraadda iyo/ama meel marinta shuruuraha ruqsadda ku qoran ee u dhexeeya qof ruqsad haysta iyo HBS, dhinacyada arrintaasi taabanayso, waa in ay isku dayaan in ay ku dhameeyaan khilaafkaas, si wada hadal ku salaysan.
- t. Haddii khilaafka lagu xallin waayo, si saaxiibtinimo leh oo wada-hadal ku dhisan, labada dhinacba waxay dacwadooda u gudbin karaan dhaxdhaxaadiye caalami ah si waafaqsan xeerarka la aqoonsan yahay, oo rugtiisu tahay meel dhexdhexaad ah, ama Maxkamadda Sare, sida uu door bidayo dhinaca dacwadda soo gudbiyey.

Qodobka 34aad: Ka-dhaafid ama Wax ka-beddelid Shuruudo

1. Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS) waa ka dhaafi kartaa shakhsi Ruqsad haysta fulinta shuruudaha ku qoran Ruqsadiisa, waxay kaloo wax ka beddeli kartaa ama laali kartaa shuruudahaas, haddii looga maarmi waayo danta qaranka isla markaasna ay wasaaradda ogolaansho ka hesho.
2. Qodobka 34aad, kuma jirto awood ka dhaafid ama ka laalis waajibeed oo ku saabsan in la bixiyo lacag kastoo ruqsadda ka timaada.

CUTUKA 4AAD – KA QAYBGALINTA SOOMAALIYA

Qodobka 35aad: Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed iyo ka Qayb Galinta Dawlad Goboleedyada

1. **Ka Qayb galinta Shirkadda iyo Dawlad Goboleedyada.** Heshiis kasta oo Wax-Soosaar Wadag ah waa in ay ku caddahay:

b. Xaqa ay SHBQS u leedahay in ay ka qayb gasho hawlaha Batroolka, ugu badnaan ka qayb gal dhan 20%.

t. Xaqa qandaraaslaha ee ka midka ah Dawlad Goboleed, taasoo ka mid ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo dhulka ruqsadda lagu baxshay uu ku yaallo, si ay uga qayb gasho hawlgallada Batroolka ilaa iyo heer gaarsiisan 10% ugu badnaan marka la eego xaqa ka qaybgalka.

2. **Go'aan ka Qaybgal.** Go'aanka SHBQS ay uga qayb galayso hawlgallada Batroolka ee si cayiman ugu cad heshiis wax soo-saar wadaag ah, waxaa gaaraya Wasiirka, haddii talada ka qaybgalka ay soo jeedisay SHBQS. Go'aanka qandaraasle dawlad goboleed oo ka mid ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo dhulka ruqsadda lagu baxshay uu ku yaallo, uga qaybgalayo hawlgallada Batroolka waxaa qaadanaya dawlad goboleedka uu hoos imaanayo halka dhulka ruqsadda lagu baxshay uu ku yaallo.

3. **Waqtiga ka Qaybgalka.** Xaqa ka qaybgalka ee lagu sheegay Qodobka 35.1, waxaa la hanan karaa inta lagu guda jiro marxalad kasta oo ay hawlgallada Batroolku socdaan, iyada oo la raacayo xeerarka iyo shuruudaha loo dhigay Heshiiska Wax-Soosaar Wadagga.

CUTUBKA 5AAD – FULINTA HAWLGALLADA BATROOLKA

Qodobka 36aad: Hab-Dhaqannada Shaqo

1. **Hab-dhaqan Wanaagga Goobta Saliida.** Hawlgallada Batroolka waxaa loo qabanayaa si waafaqsan Dhaqanka Wanaagsan ee Goobta Saliida, kaasoo la waafajinayo dhaqamada iyo hababka ay isticmaalaan shirkadaha Batroolka adduunku, ayna fuliyaan hawl wadeenno taxaddar iyo xilkasnimo leh, iyaga oo dhawraya shuruudaha iyo xaaladaha la midka ah ee ay horay u soo mareen, lana xariira dhinacyada muhiimka ah hawlaha Batroolka, oo asalkeediiba loola jeeday in lagu sugo:

b. Dhawrida khayraadka Batroolka, oo loola jeedo ka faa'iidsiga hababka iyo nidaamyada haboon, si halka ugu saraysa loo gaarsiiyo soo kabashada wax soo saarka haydroskaarbooniska, si iswadis leh xag farsamo iyo xag dhaqaale, iyadoo lala beegsanayo in aanay dhicin hoos u dhac ku yimaada kaydka, lana isticmaalayo

mabaa'diida wax ku oolka ah ee heerarka wax soo-saarka iyo dhawrista degaanka, si loo yareeyo wax yeelaynta dhulka korkiisa;

ii. Falgalka nabadgalineed, oo la xariira isticmaalka hababka iyo nidaamyada horumarinaya nabadgelyada shaqada iyo ka hortagga shilalka;

iii. Dhawrista degaanka, oo waajib ka dhigaysa in la raaco hababka iyo nidaamyada yaraynaya wax u dhimidda degaanka ee ka dhalan kara hawlaha Batroolka;

2. **Xanaanaynta.** Wax-Soosaarka Batroolku wuxuu u dhici karaa:

b. Intii la kari karo oo suuragal ah, si walba, looga soo saaro Batroolka meesha uu ku jiro oo ka mid ah kayd walba, ama kaydada isku darsan;

t. Si waafaqsan dhaqanka wanaagsan ee goobta saliidda iyo maba'diida dhaqaale ee caafimaadka leh; iyo

j. Intii la kari karo, si walba, laga fagaado khasaare ku yimaada Batroolka iyo tayada kaydka saliidda.

3. **Qiimeynta Joogtada ah.**

Qandaraaslayaashu waa in ay sameeyaan qiimeyn joogto ah ee qorshaha fog ee Batroolka iyo isticmaal xirfadeedka ee xal u helidda umuuraha, isla markaana waa in ay qaataan talaabooyinka loo bahanyahay, si loo gaaro arrimahaas, lana socodsiiyaan HBS isbeddel kasta oo macna leh, siduu qabo dhaqanka wanaagsan ee goobta saliidda.

Qodobka 37aad: Dib u furfuridda Agabka Shaqo ee Batroolka (Decommissioning)

2. **Waqtiyeynta Dib u Furfuridda.** Shaqsiga ruqsadda haystaa marka ugu dhaqsiiyaha badan oo u samaynayo dib u furfuridda waa marka:

b. Uu joojinayo ruqsadda.

t. Aan looga baahnayn, mar dambe, qabashada hawlo batrool.

j. Aanay jiri karin ogolaansho qoraal ah oo laga helo HBS, waafaqsanna xaaladaha ogolaanshaha la bixiyey.

x. Aanay , si kale, ruqsaddu u sheegin

3. Faahfaahinta Ruqsadaha iyo Xeerarka.

Ruqsadaha waa in ay ku jirtaa qodobo ka hadlaya dib u furfuridda hawlaha Batroolka. Wasaaraddu, iyadoo raacaysa talada iyo ku talinta HBS, waxay samaynaysaa Xeerar Sharcigaan hoos yimaada oo la xariira dib u furfuridda hawlaha Batroolka.

3. Sanduuqa Dhaqaalaha Furfuridda. Shaqsigu Ruqsadda haysta waa in uu sameeyaa sanduuq dhaqaale ee furfuridda wax yar ka dib marka la oggolaado qorshaha soo saaridda iyo hawlgalka ama bixinta ruqsadda loo qaato nidaamka daabulaadda, sida ku qoran xeernidaamiyayaasha. Sanduuqa dhaqaale ee furfuridda waa in uu ahaado mid ku filan in uu daboolo kharashka furfuridda oo buuxa.

CUTUBKA 6AAD – MACLUUMAAD IYO DABAGAL

Qodobka 38aad: Xog iyo Macluumaad

1. **Xaq-u-yeelashada ogaanshaha Macluumaadka iyo Xogta.** Soomaaliya waxay xaq u leedahay lahaanshaha dhammaan macluumaadka iyo xogta, kuwo cusub, la soo xigtay, laga shaqeeyey, la tarjumay ama la falanqeeyey, oo la helay, lana xiriira ruqsad kasta oo la baxshay. Xilkasnimada sir xajinta haboon, waxaa loogu dhaqmayaa si la mid ah sida ku cad Qodobbada 18.2 iyo 19.9.
2. **Xog Gudbin.** Macluumaadka iyo Xogta la helo, inta lagu guda jiro hawlgallada Batroolka, waxaa si xor ah u gudbin kara Shaqsiga haysta Ruqsad, iyadoo shardi looga dhigayo in HBS ay dalabto asalka shayga, marka laga hadlayana nuxurkoodu uu yahay dhagxaan, dareerayaal ama muunad kaloo muuqaal leh, iyadoo Soomaaliya gudaheeda lagu haynayo qayb la isticmaali karo oo asalka shayga ah, lana xariira dhammaan macluumaadka iyo xogta oo qaab muuqaal iyo elektroonikba leh.

Qodobka 39aad: Hanti dhawr iyo Kormeer

1. Kormeere

- b. HBS waxay u magacaabi kartaa qof in uu noqdo kormeere, marka laga hadlayo ujeeddooyinka Sharcigaan.
 - t. Kormeeruhu, wuxuu yeelanayaa awoodaha iyo xuquuqaha lagu siiyey Xeerarka.
2. **U Madax Banaanaanta Helista Diiwaanada iyo Xisaabaadka.** Shaqsiga Ruqsada haysta, codsi ka dib, waxuu ku soo wareejinayaa HBS diiwaanada iyo xisaabaadka lahayo si loo baaro.

Qodobka 40aad: Dhammaadka Ruqsadda

1. Joojinta

- b. Joojinta ruqsad la baxshay, sabab kasta awgeed, waa in ay noqotaa mid aan waxba u dhimayn xuquuqda iyo waajibaadka lagu caddeeyey sharcigan, xeerarka ama ruqsadda; loogana dan-leeyahay in looga samata baxo ficilka joojinta, xuquuqda iyo waajibaadka ka soo unkamaya talaabadaas iyada ah, ka hor inta aan la hirgelin in falka joojinta, iyo dhammaan qodobada ku soo arooray ruqsadda, looguna baahan yahay si caqli gal ah, oo ka dhigaysa in xuquuqda iyo waajibaadku si buuxda u noqdaan kuwo dhaqangal ah oo raali galin kara Shaqsiga , keeni karana ka gudubka wixii ku saabsan falka joojinta, intii muddo ah ee loo baahan yahay.
- t. HBS waxay leedahay awoodda ay ku joojin karto ruqsadda, sida lagu caddeeyey isla ruqsadda.

2. Dad Ruqsad Wadareed Haysata

- b. Haddii ay jiraan, tiro wax ka badan hal shakhsi oo ruqsad haysta, oo ku saabsan ruqsad cayiman; xaaladana dhashaan oo keenaya in HBS ay joojiso ruqsad, HBS waxay door bidaysaa in ay ruqsadda xarigga u jarto, iyadoo lagu soo koobayo oo kaliya shaqsiga ruqsadda haysta oo ficilladoodu ama gaabintoodu (markay la xariirto Shirkadaha ficilada, gaabinta ama dhacdoinkuba la soo gudboonaadeen), kuwaas oo dhaliyey xaaladaha caynkaas oo kale, waxayna ogeysiin sidaas ah siinaysaa inta soo hartay ee Shaqsiga ruqsadda haysata.
- t. Marka HBS ay joojiso ruqsadda, sida ku cad Qodobka 40.2.b, waa inay siisaa Shaqsiga ruqsadda leh ee soo haray, xaqqa mudnaantaasi ay u noqdaan kuwa ugu horeeya ee hela saamigii la joojiyey si u dhiganta saamiyada la kala leeyahay. Saami kasta oo aanay iibsan kuwa ruqsadda ku soo haray waa in uu ku soo wareegaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 41aad: Hufnaanta Dawladda Dhexe, Wasaaradda iyo HBS

1. Beriyeelidda. Shaqsi haysta ruqsada waa inuu:

- b. Ka difaaca, kana dhawraa, waxna usan ugu dhimin Dawladda, Wasaaradda iyo HBS, dacwo kasta oo ka timaada dhinac saddexaad, ha ahaato mid toos ah ama dadban, oo la xariirta hawlaha Batroolka, bixiyaanna dhammaan magdhwyada ku saabsan dacwadaha madaniga ah, ashtakooyin ismoodsiin ku dhisan ama codsiyo.
- t. Ilaa iyo inta ay Wasaaraddu ku qancayso, kadib markay la tashato shakhsiga ruqsadda haysta; dembiyada la filayo ee ku cad Qodobka 41.1.1, waxaa lagu xallin karaa siyaalo kale oo ay ka mid tahay talo galin shirkad kale ama damaanad bangi ama warqadda ballanqaad ee caddaynaysa dhabar u ridashada deynka iyo caymis galin la xiriira baaxadda daymanka, kuna dhisan xisaabtan xoog leh, hadba sida Wasaaradda u rabto, waqti ka waqti.

CUTUBKA 7AAD – MACLUUMAAD SHAACSAN

Qodobka 42aad: Faafinta Hay'adda Batroolka Soomaliya (HBS)

1. **Faafin.** HBS waxay ku shaacinaysaa faafinta rasmiga ah;
 - b. Wargelinta ku saabsan bixinta ruqsadaha, iyo shuruudaha kooban ee ruqsadaha caynkaas oo kale ah.
 - t. Soo bandhigid dalbashada codsiyada ka qaybgalka ruqsadaha sida ku qoran Qodobka 26.1.1.
 - j. Wargelin la xariirta sida loo joojinayo Ruqsadaha.
2. **Faafinta Dalabka Codsiyada.** HBS waa inay soo bandhigtaa dalabyada cosdiyada, kuwaasoo loogu soo gudbinayo araajiyo ruqsado weydiin ah, sida ku cad Qodobka 26.1.1, kadib marka la faafiyo, si waafaqsan xeerarka.

Qodobka 43aad: Xog Shaacsan

1. Ka Qaybgalka Dadweynaha

- b. HBS waa in ay la wadaagtaa dadweynaha:
 - i. Shuruudaha muhiimka ah ee la soo koobay, lana xiriira, dhammaan ruqsadaha iyo isbeddellada ku saabsan ee la soo bandhigay, haddii ay yihiin kuwo la joojiyey ama haddii kalaba.
 - ii. Faahfaahinta canshuur dhaafyada la sameeyey, ama bedellada iyo hakinnada ee la xiriira shuruudaha ruqsadda ee ku cad Qodobka 34; iyo
 - iii. Nuqullada dhammaan heshiisyada Midaynta.
- t. HBS waa in ay dadweynaha la wadaagtaa, in ku siman waqti macquul ah gudihisa, faah-faahin kooban, haddii la weydiisto arrintaas, oo ah:
 - i. Qorshaha Horumarineed ee la ansixiyey; iyo
 - ii. Dhammaan shaqooyinka iyo macaamilada kale oo la ogolaaday ee la xariira ruqsadaha, iyada oo loo tixgelinayo in is-aamininaada kala ganacsigu uu yahay mid ku dhisan shuruudaha ganacsiga.

2. Soo Bandhigidda Sababaha.

Toban casho, oo maalmo shaqo ah gudahood, oo la xiriira codsi la sameeyey, HBS waa in ay soo bandhigta, si kooban, sababaha ay:

- b. U bixisay ruqsad, ka dib, marka ay shaacisay dalabyo la xiriira codsi, sida ay sheegayso Qodobka 26.1.1.
- t. U bixisay ruqsad, iyadoo aan la shaacin dalabyo la xiriira codsi, sida ku qoran Qodobka 26.1.2.
- j. U ansixisay qorshaha horumarineed ee hoos imaanaya Heshiiska Wax-Soosaar Wadaagga.
- x. U bixisay canshuur dhaafka, ama u ogolaatay beddelaad iyo hakin ku saabsan shuruudaha Ruqsadda ee ku cad Qodobka 34.
- kh. U gaartay go'aan kasta ama ay u bixisay ogolaansho u baahan faafin, iyada oo la xurmaynayo Ruqsadda.

3. U Hoggaansanaanta Warbixinada.

- b. Shirkaduhu waa in ay warbixin ka keenaan sida ay ugu hoggaansan yihiin shuruudaha la xiriira sharciga iyo ruqsadaha, si waafaqsan habka iyo faah-faahinada looga baahan yahay ruqsaddooda, sida lagu caddeeyey xeerarka.
- t. HBS waa in ay u soo bandhigtaa dadweynaha warbixinadaas, marka laga reebo qayb kasta oo ka mid ah warbixinta oo shakhsiga ruqsada haysta uu codsaday in sir ahaan loogu xajiyo, taasoo hay'addu u aqoonsatay in ay ka mid tahay sir wax kala iibsiga.

4. Ogaanshaha Dadwaynaha ee Xogta Lacagaha la Baxshay. HBS waa in ay dadwaynaha soo hor dhigtaa warbixinada lacagaha laga helay Shaqsiyada ruqsadaha haysta, oo ku saabsan lacagaha la xiriira hawlaha Batroolka oo ay siiyeen Dawladda Soomaaliyeed

5. Khidmada ka Qaybgalka. macluumaadka ku xusan qodobka 43, way u furan yihiin ogaalkooda qof kasta, marka laga hadlayo, bixinta khidmadaha halkaas ku cad, sida uu qorayo xeerka.

6. **Luqadda.** macluumaadka ku qoran Qodobka 43.1.2, waa in ay ku soo baxdaa ugu yaraan hal luqo oo rasmi ah ama luqadda labaad ee dalka.

Qodobka 44aad: Daah Furnaan

1. **Mabaadi'da daah furnaanta.** Mabaadi'ida soosocota, Waxaa lagu dhaqayaa hawlaha Batroolka, iyada oo loo marayo sharcigaan, iyo xeerarka la soo saarayee lagu fulinayo sharcigaan, iyo qawaaninta, tilmaamaha, go'aamada iyo amarrada loo dejiyey in sharcigaan lagu dabagalo:
- b. Waxaa jiraya faafin joogta ah oo lagu sameeyo dhammaan lacagaha la xiriira Batroolka oo ay Shaqsi ruqsad haysta siiyaan Dawladda iyo dhammaan dakhliga maadiga ee Dawladda uga soo xarooda Shaqsiga ruqsadda haysta. Faafinnadaan waa in lagu soo bandhigaa kulammo ballaaran, ka qaybgalkoodu dhan walba u furan yahay, loona qabto si macquul ah.
 - t. Dhammaan kharash bixinada iyo dakhliyada maadiga ah, waxay ku qoton sanaanayaan hab aaminaad iyo baaritaan madax-banaani leh oo waafaqsan xeerarka caalamiga ee hantidhawrka.
 - j. Dhammaan kharash bixinta iyo dakhliyada maadiga ah, waa in uu iswaafajiyaa maamule madax bannaan oo loo qaateen ah oo ay xukuumadda magacawdo, kaasoo ku shaqaynaya halbeegyada hanta dhawrka caalamiga ah, taasoo ay la socoto soo bandhigidda aragtida maamulaha ee ku saabsan isu-keenidda xisaabaadka, oo ay ku jirto wixii isdhaaf ah, hadiiba ay jirto.
 - x. Shirkadaha ka socda bahwaynta ganacsiga Soomaaliyeed oo aan lugta ku la jirin hawlgallada Batroolka, waa in ay si firfircooni leh uga qayb qaadan karaan, noqon karaanna ka qaybgalayaal xagga currinta hindisaynta, la socoshada iyo qiimeynta geeddi socodyada ku xussan Qodobka 44.1.
 - kh. Mabaadi'dan waa in lagu maamulaa SHBQS iyo Qandaraasle kasta oo Dawlad goboleedyada dalka ka tirsan.

CUTUBKA 8AAD – XEER-NIDAAMIYE IYO TILMAAMO

Qodobka 45aad: Xeer-Nidaamiye

1. Awoodda Samaynta Xeerarka.

Wasaaraddu, iyada oo tixgelinaysa talooyinka iyo soo jeedinta HBS, waxay samaynaysaa Xeerar hoosyimaada sharcigan oo la xiriira arrimaha soo socda:

- b. Habka kala qoqobidda dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
- t. Raadinta, horumarinta iyo soo-saaridda Batroolka.
- j. Isticmaalka iyo soo bandhigidda xogta, macluumaadka, diiwaanada iyo warbixinada.
- x. Cabbiraadda, iibinta ama ka maarmidda Batroolka.
- kh. Caafimaadka iyo bedqabka.
- d. Ilaalinta iyo dib u noolaynta degaanka/Bii'ada.
- r. Maamulidda kheyraadka.
- s. Dhismooyinka, kaabayaal dhismo iyo xarumo.
- sh. Nadiifinta iyo la tacaalidda khasaaraha la xiriira Batroolka fatahay.
- dh. Ka guuris iyo dib u furfuris.
- c. Kontroolka dhaqdhaqaaqa gudaha iyo dibadda Soomaaliya ee la xiriira dadka , maraakiibta, diyaaradaha, baabuurta iyo wax kasta ee bani'adam sameeyey oo qaab rakooyin iyo dhismooyinba leh ee saameynaya arrimaha Batroolka.
- g. Qorsho shaqo iyo miisaaniyadeed.
- f. Kontroolka canshuuraha ka imaanaya lana xiriira soo galitaanka qolo saddexaad.
- q. La xisaabtanka Shaqsiga ruqsadda haysta, xisaabaadkiisa iyo diiwaanadiisa.
- k. Warbixinnada ay soo gudbinayaan Shaqsiga ruqsadda haysta, kuna saabsan u hogaansananta waajibaadka lagu cadeeyey Sharcigaan iyo ruqsadahaba, ayna ku jiraan waxyaabaha soo socda:
 - i. Tababarrida iyo shaqaalaynta muwaadiniin Soomaaliyeed.

- ii. Gadashada badeecadaha iyo adeegyada laga helo gudaha Soomaaliya.
 - iii. Dhowrida caafimaadka iyo ammaanka goobta shaqada.
 - iv. Ilaalinta degaanka.
- l. Khidmadaha la bixinayo oo ay ku jiraan, shaqsiyaadka ruqsadaha dalbanaya, kuwa ruqsadaha haysta, sidoo kale kuwa Shaqsiyaadka raba inay baaraan diiwaanka guud.
- m. Dembiyada iyo ciqaabaha ka dhasha hawlaha Batroolka.
- n. Arrin kaloo kasta ee la xiriirta sharcigaan.
- 2. Mabaadi'da Nidaaminta.** Marka la samaynayo xeerarka, dawladdu waa in ay raadisaa, sidii loo yarayn lahaa qodobbada wax burinaya, oo loogu roonaanayo kuwa salka ku haya, natiijooyin iyo waxqabadba; waana in ay isticmaashaa, sida ugu badan ee suurtagalka ah, halbeegyada caalamiga ee la aqbalay.
- 3. Faafinta Nidaamyada.** Wasaaraddu waa in ay ku soo bandhigtaa nidaamyada ay soo rogtay, faafinta rasmiga ah.

Qodobka 46aad: Tilmaamo

Ka sokow awoodda ay u leedahay bixinta tilmaamaha ee ku qeexan Qodobbada 25.4 iyo 33.1.3, HBS, waxaa kaloo ay tilmaamo siin kartaa Shaqsi ruqsad haysta, taas oo la xiriirta:

- b. Arrin kasta, sida lagu cadeeyay Qodobka 45.1.
- t. Arrimo si kale waajib uga dhigaya, u hoggaansanaanta sharicigaan, xeerarkiisa ama ruqsadda.

CUTUBKA 9AAD – QODOBBADA CIQAABTA

Qodobka 47aad: Baaxadda Xududeed iyo Maaddo ee Cutubkan.

Qodobada cutubkan, waa kuwo aan waxba u dhimaynin, mas`uuliyadda ciqaabeed iyo midda madani ee ka dhalan karta sharciga guud ee dalka.

Qodobka 48aad: Dembiyada iyo Ciqaabaha.

Dambiyada ka dhasha hawl gallada aan ruqsadaysnayn, khatarta ku imaan karta dadka, hantida iyo bii`ada, is hortaagga ku dhaqanka awoodaha

Qodobka 49aad: Mas`uuliyadda dadka, Shirkadaha iyo Hay`adaha Kale Qaanuuniga ah.

- 1. Mas`uuliyadda Hay`adaha iyo wakiiladooda.** Shaqsiyaadka qaanuuniga ah, shirkadaha ama hay`adaha kale ee sharciga ah, oo ay ku jiraan kuwa aan shakhsiyad sharciyeed lahayn, waxaa lagu soo oogi karaa ciqaab ku wajahan xadgudubyada lagu sheegay cutubkan, markay xadgudubyadaas galaan waaxyo ama wakiillo ka tirsan, iyagoo isticmaalaya magaca ay xambaarsan yihiin iyo danaha wada jirka ah ee ka dhexeeya.
- 2. Difaaca ku salaysan habraaca saxan:** Mas`uuliyad dembiyeed way ka wareegaysaa shirkadda, haddii Qofka dambiga galay uu u dhaqmo, si bareer ah, ee waafaqsan, kuna beegan amarada iyo tilmaamaha sida hagaagsan loo baxshay.
- 3. Mas`uuliyadda Wakiilka.** Mas`uuliyadda hay`adaha ee lagu sheegay Qodobka 49.1, kama baxsana masuuliyada shakhsiyadeed ay kala leeyihiin wakiilada.
- 4. Masuuliyad wadareed iyo midda keli keliga ah.** Hay`adaha lagu sheegay Qodobka 49.1, waxay si wadajir ah ama kala gooni ah masuul uga yihiin, sida lagu sheegay sharciga madaniga ah, bixinta ganaax kasta ama magdhaw, ama fulinta waajibaadyada ka dhashay dhacdooyinka ama ka yimid arrimaha ujeeddada sharcigani ka hadlayo.

kormeeraha, marin habaabinta, u-hogaansamid la`aanta xeerarka ama tilmaamaha, ciqaabaha iyo ganaaxyada ka dhalanaya waxay Wasaaraddu ku soo saaraysaa xeer gaar ah.

Qodobka 50aad: Ganaaxyada Shaqsiyaadka, Shirkadaha iyo Hay'adaha kale ee Qaanuuniga.

- 1. Ganaaxyada.** Marka laga hadlayo, xaaladaha Shaqsiyaadka sharciyeysan, shirkadaha ama hay'adaha kaloo qaanuuniga ah, oo ay ku jiraan kuwa aan haysan shakhsiyad sharciyeed, heerka ganaaxu wuxuu noqonayaa hadba sida ay maxkamaddu goyso, iyadoo la tixgelinayo xaaladda dhaqaale iyo maaliyadeed ee shakhsiga sharciyeysan, shirkadda ama hay'adaha kale ee qaanuuniga ah, lana eegayo culayska iyo waxa ka imaan kara fal dembiyeedka.
- 2. Wax ku Lahaanshaha Raasumaalka.** Haddii ganaaxa lagu fuliyo hay'ad aan la hayn shakhsiyad sharciyeed, bixinta ganaaxaas waxaa dusha laga saarayaa raasumaalka Hay'adaasi; haddayse, aanu jirin raasumaalkaasi ama uu ka hooseeyo heerka koboca loo baahan yahay, waxay bixintu dushiisa tahay, wadar ahaan ama kali kali, rasumaalka mid kasta oo shirkadda ka mid ah.

Qodobka 51aad: Kormeeridda

HBS iyo kormeeraha, sidoo kale, waaxyada ka midka ah maamulka guud oo loo wakiishay hawlaha kormeerka, sida ku cad sharciga iyo xeerarkiisa, waxay mas`uul ka yihiin in ay sugaan, sidii kormeerku ugu dhici lahaa, si waafaqsan qodobada sharcigan ama xeerarkiisa.

Qodobka 52aad: Warqad Fulin Xukun oo ka Baxsan Hannaanka Garsoorka.

Iyada oo looga dan leeyahay soo uruurinta qasabka ah, sida sharciga guud sheegayo, caddayn ay soosaartay HBS oo la xariirta dayn jirta, ama lacag bixinteeda la joogo, taasoo ka dhalatay dhaqan galinta qodobada sharcigan ama xeerarkiisa, oo aan la bixin waqtigii ku haboonaa oo ay HBS horay u cayintay, caddayntaas oo qoraal ah aan loo ogeysiinayo shakhsiga deynta qaba, waxay noqonaysaa warqad fulin xukun ah, oo ka baxsan hannaanka garsoorka.

Qodobka 53aad: Sharciyada Is Kaabaya

- 1. Ciqaabaha iyo Sharciyada kale.** Sharciga guud ee ciqaabaha, iyo wixii la mid ah ee ku saabsan sharciyada maamulka iyo madaniga ee muhiimka ah ee Soomaaliya, waakuwo loo fulin karo qaab is dhamaystiraya, iyada oo la samaynayo iswaafajinta loo baahan yahay, si loo dabbaqo qodobada cutubkan ku xusan.
- 2. Diidmo Iska horimaad.** Marka ay dhacdo in qodobada sharciyada kale Soomaaliya ay ka horyimaadaan qodobada sharcigaan ama xeerarkiisa, kuwaasi waxay noqonayaan kuwa aan waxba ka jirin, markay timaado ku dhaqankooda hawlgallada Batroolka.

CUTUBKA 10AAD – QODOBBADA GUNAANADKA AH IYO KUWA KU-MEEL-GAARKA AH

Qodobka 54aad: Qodobka Kala guurka ah

1. **Ruqsadihii Hore.** Wasaaraddu waxay soo saaraysaa Xeerar caddaynaya hab maamulka ay raacayaan, iyo sidoo kale waajibaadyada laga rabo, Shirkadaha ka mid ahaa ama ku jira hawlgallada Batroolka ee la xiriira qandaraasyadii hore oo muujinaya xuquuq ay bixisay Jamhuuriyaddii Dimoqraadiga ee Soomaaliya, 30kii Disember, 1990, ama ka hor, kuwaas oo loola jeedo bixinnadii hore. Xeerarkaas waa in ay ku jiraan qodobada soo socda:

b. Qandaraasle hore, wuxuu xaq u leeyahay inuu u rogo heshiiskiisii hore qaab ruqsadeedka ugu dhaw ruqsaddiisii hore. Heshiiskii hore oo lahaa qaab ku dhaqan kaliya (Concession) oo siinayey qandaraaslihii hore inuu kaligii qabto hawlaha Batroolka waxaa loogu badalayaa heshiis leh qaab Wax-Soosaar Wadaag (PSA).

i. Qandaraasle hore oo raba inuu beddalo heshiiskiisii hore waa inuu siiyaa Wasaaradda:

- Nuqul dhab ah oo sheegaya wixii uu ka qabtay heshiiskii hore.
- Caddayn lagu qanci karo oo muujinaysa in arrinku dhacay 30kii, Disember 1990, ama ka hor sheegaysana inuu si buuxda u fuliyay waajibaadyadii ku qeexnaa bixinnaddii hore.
- Nuqulka diiwaanka hawlgalka, si waafaqsan heshiiskii hore, oo ay ku jirto ka tegista qayb uun ka mid ah goobtii heshiiska ee ruqsaddii hore.
- Nuqul la xiriira dhammaan macluumaadkii iyo wararkii ku caddaa heshiiskii hore ee loo baahnaa in loo soo gudbiyo Dawladda.
- Caddaynta dhinacyada wali ku jira heshiiskii hore, iyo sida ay dhinacyadaasi u hanteen dantoodii la xiriirtay heshiiskii hore, oo ay ka dhaxleen qolooyinkii assal ahaan u haystay ruqsaddii hore.

i. Inuu Ogolaado in waajibaadka dib u furfurista ku cad Ruqsadda cusub, ay ka mid noqotaa furfuridda shaqooyinkiisii uu horay u qabtay, iyadoo la raacayo heshiiskii hore.

ii. Ogolaado shuruudaha Ruqsadda cusub ee dhexmarta qandaraaslihii hore iyo Wasaaradda, waqti, ama ka hor, taariikh ay Wasaaraddu cayintay, kaasoo aan ka dambaynaynin taariikhda lagu sheegay Qodobka 54.2.

iii. Ruqsad hoos timaada Qodobka 54.1.b.iii waa in ay la socotaa mabaadi'da Sharcigaan, Xeerarkiisa iyo qaabka Qandaraaska ay faafisay Hay'adda (HBS), lana xariirta Qodobka 19.20.kh.

2. **Dadaalka Wada Xiriirka.** Wasaaraddu waa in ay samaysaa dadaalo macquul ah si ay ula xiriirto Shaqsi kasta kasta oo horay Qandaraas u haysatay, si ay ugu suurtagasho in ay ogaato kuwa ay yihiin, talana uga siiso xuquuqdooda ku cad Qodobka 54.1.
3. Haddii ay soo baxdo in Heshiis Hore ay kuwada jireen in ka badan hal shakhsi, Wasaaraddu waxay u baahantahay oo kaliya in ay samayso dadaal macquul ah oo ay kula xiriirto shakhsiga ugu muuqda Wasaaradda in uu yahay hawl-wadeen. Ma jiro qandarasle hore oo sideedaba xaq u yeelan kara inuu Wasaaradda ama Dawladda ku eedeeyo gaabis loo aanaynayo in Wasaaraddu u suurta galiwayday fulinta Qodobkan 54.2.
4. **Waqtiga uu Dhammaanayo kala Beddelku.** Haddii Heshiiskii Hore aan loo badalin Heshiis Wax-Soosaar Wadag oo hoos yimaada Sharcigaan sida ku cad qodobada qaybta sanad guurada kowaad markuu Sharcigaan dhaqangalo, markaas:
 - b. Heshiiskii hore waa la joojinayaa, wuxuuna noqonayaa waajibaad aan Dawladdu ku khasbanayn inay isku waajibiso, marka la gaaro sanad guurada koowaad ee sharcigan dhaqan galo.
 - s. Dawladdu mas`uul kama aha wax kastoo khasaare, kharash, qaan sheegasho ama wax dhibaala ah oo ka yimaada joojinta heshiiskii hore.
 - j. Dawladdu, ka Qaran ahaan, waxay xaq u leedahay in ay ku dhawaaqdo in aan sinnaba loogu qabsan karin arrin ka timid qandarasle hore oo ku saabsan joojinta heshiiskii hore.

4. **Heshiisyadii 1990kii ka dambeeyey.** Laga bilaabo taariikhda sharcigan dhaqangalo:

- b. Xaq walba oo lagu fulinaayey hawlgalada Batroolka oo jiray ka dib Disember 30dii, 1990kii iyo ka hor Dawladda Federaalka Soomaliyeed waa la joojiyay, waxayna noqonayaan waajibaad aan Dawladdu ku khasbanayn inay dhawrto.
- t. Dawladdu mas`uul kama aha wax kastoo khasaare, kharash, qaan sheegasho ama wax dhibaala ah oo ka yimaada joojinta caynkaas oo kale.
- j. Dawladdu, ka Qaran ahaan, waxay xaq u leedahay in ay ku dhawaaqdo in aan sinnaba loogu qabsan karin arrin uu soo bandhigay Shaqsi, loolana jeedo joojinta xaqqa noocaas oo kale ah.

Qodobka 55aad: Dhaqangalka Sharcigaan

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa, awoodna yeelanayaa, markii uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, isla markaana uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah.